


# TILMAAMAHA HAWSHA EE KA QEYBGALAYAASHA EARLY ACHIEVERS

Xagaaga 2022
Waxaa laga soo qaatay Xarunta Qaranka ee Tayada Waxbarida iyo Waxbarashada

Noocyada Isbaanishka iyo Soomaaliga ee Tilmaamaha Hawsha

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Tusmada

1. Hordhac ........ 1
Guudmar: Waa maxay Early Achievers? ........ 1
Doorarka Hay'ada ........ 1
Ujeedada Tilmaamaha Howlgalka Ka qaybqaatayaasha Early Achievers ........ 2
Bayaanka Takoor La’aanta ........ 3
Wargelinta Waajibka ah ........ 3
2. Horumarinta Tayada ee Joogtada ah ........ 3
Dib U Qiyaasidda Early Achievers ........ 4
Wareega Horumarinta Tayada ee Joogtada ah ........ 4
3. Qaabdhismeedka Aqoonsiga Tayada Early Achievers ........ 4
Guudmar ........ 4
Heerarka Tayada Early Achievers ........ 5
Wareegyada Aqoonsiga Tayada ........ 6
Qaabdhismeedka Heerka Tayada ........ 7
4. Bilaabida ........ 8
Guudmar ........ 8
U Qalmidda ........ 8
Shuruudaha Ka Soo Qaybgalka ........ 9
Diiwaangelinta Early Achievers ........ 9
Dadka Laga La Xiriirayo Early Achievers ........ 9
Tababaridda ........ 9
Taageerada iyo Macluumaadka Farsamo ........ 10
5. Wareega Aqoonsiga Tayada ........ 11
Guudmar ........ 11
Waxyaabaha Ku Jira Aqoonsiga Tayada ........ 12
Shaqaalaha Taageerada Aqoonsiga Tayada ........ 15

Qorshaha Horumarinta Tayada ... 15
6. Heerka Tayada ... 16
Dhameey Heerkayga Tayada ... 16
Shuruudaha U Qalmitaanka Dhamaystirka Heerka Tayada ... 16
Meelaynta Heerka Tayada ... 16
Cusnoonaysiinta Heerkayga Tayada ... 17
Dib U Soo Gudbinta Heer Tayo oo La Cusboonaysiiyey ... 17
Howlaha Sixidda ... 19
Barnaamijyada Waxbarashada Hore Ee Aan Doonayn Inay Dhamaystiraan Heer Tayo ... 20
Ka Noqoshada Dhamaystirka Heerka Tayada ... 20
7. Shuruudaha Waqtiga ... 21
Guudmar ... 21
Shuruudaha Waqtiga ... 21
Qorshaha Kordhinta Jadwalka ... 22
8. Taageerooyinka iyo Abaalmarinda Ka Qaybgalaha ... 24
Guudmar ... 24
Adeegyada Tababarka ... 24
Hindisaha Tayada ee Dhalashada illaa Seddex Jir ... 24
Deeqaha iyo Minxooyinka Horumarinta Xirfadeed ... 25
Wakhtiga Beddelka ... 26
Deeqaha Baahiyada Ku Saleysan ... 26
Lacag Celinta Kaalmada ee Heerarka leh ... 28
Abaalmarinada Wanaajinta Tayada ... 29
Agabka Suuqgaynta iyo Gaarista ... 33
9. Sharuudaha iyo Filashooyinka Ka qeybqaataha ... 34
U Qalmidda ... 34
Qeexitaanka Ka Qaybgal Firfircoon ... 36
Diiwaan Haynta ... 37
Sharuudaha Ogaysiinta ... 37
Sida Isbeddelada Cinwaanka iyo Lahaanshaha u Saameeyaan Kaqaybgalka Early Achievers ... 37
Wadaagida Macluumaadka ... 38
Isticmaalka/Ammaanka Intarnetka ... 38
Iska horimaadka Danaha ... 38

Heshiiska Adeegyada Early Achievers ........ 38
Deeq Qaataha Head Start/Mas'uuliyadaha Qandaraaslaha /ECEAP/Early ECEAP........ 39
Shuruudaha Cayrinta ........ 39
Nidaamka Cayrinta........ 40
Ka Laabashada Early Achievers ........ 41
Dib u soo Codsashada Early Achievers........ 41
Qaamuuska Erayada ........ 42

# 1. Hordhac

## Guudmar: Waa maxay Early Achievers?

Early Achievers waa nidaamka horumarinta iyo aqoonsiga tayada ee gobolka Washington (Quality Recognition and Improvement System, QRIS). Waxaa lagu sameeyay iyada oo lala kaashanayo barnaamijyada waxbarashada hore ee lagu bixiyo daryeelka aadka u tayo sareeya kaas oo lagu taageerayo waxbarashada iyo korniinka ilmaha ee hore. Early Achievers waa nidaam loogu talogalay inuu:



- Hubiyaan in carruurtu helaan waayo-aragnimo waxbarashada hore oo tayo sare leh ee ku caawisa inay kobciyaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan dugsiga iyo nolosha.
- Ka taageeraan xirfadlayaasha waxbarashada hore si ay u bixiyaan daryeel tayo sare leh iyada oo la siinayo khayraad sida fursadaha koboca xirfadle, tababar, iyo taageero maaliyadeed.
- Ka caawiyaan waaladiinta iyo daryeelayaasha in ay helaan xarunta daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore oo tayo sare leh oo ku habboon baahiyahooda iyada oo la siinayo macluumaad ku saabsan tayada xarunta.

The Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxay Early Achievers u maamushaa sidii istiraatijiyad fure u ah yoolka DCYF ee hubinta in dhammaan carruurtu bilaabaan dugsiga iyagoo diyaar u ah inay wax bartaan.

Iyadoo ka qaybqaadashada Early Achievers ay tahay mid ikhtiyaari ah, qaar badan oo ka mid ah taageerooyinka iyo dhiirigelinta daryeelka ilmaha iyo barnaamijyada waxbarashada hore ee Gobolka Washington waxay u baahan yihiin ka qaybqaadasho firfircoon ee Early Achievers.

Early Achievers waxa uu waafaqsan yahay, oo uu taageera oo lagu dhisay barnaamijyada muhiimka ah ee waxbarashada hore ee Washington. Hadafkayagu waa in aan u abuurno barnaamijyo dhamaystiran oo loogu talagalay carruurta iyo qoysaska si aan u caawino dhammaan caruurta inay koraan, koraan, oo si guul leh uga gudbaan carruurnimada hore oo ay u gudbaan dugsiga hoose ee hore. Kaqaybgalayaasha Early Achievers waa ka qayb nidaam tayo oo caawisa hubinta in carruurtu helaan daryeel aad u tayo sarreeya iyadoon loo eegin halka ay ku nool yihiin - maadaama oo ay tahay in ilmo kastaa uu fursad u helo inuu si xoogan u bilaabo.

## Doorarka Wakaaladda

Waxaa jira ururo badan oo muhiim u ah guusha Early Achievers, sida State Board of Community and Technical Colleges, School’s Out Washington, The Imagine Institute, and Washington Communities for Children. Hay'adaha soo socda ayaa qayb muhiim ka ah fulinta toos ka ah ee Early Achievers, oo waxay leeyihiin doorar kala duwan sida ku cad Jaantuska 1:

- Department of Children, Youth, and Families (DCYF)
- Child Care Aware of Washington (CCA of WA)
- University of Washington Cultivate Learning (UW)

*Jaantuus 1: Iskaashatooyinka Dhaqangalinta*




## Ujeedada Tilmaamaha Howlgalka Ka qaybqaatayaasha Early Achievers

Dukumintigan wuxuu:

- Caawin doonaa barnaamijyada waxbarashada hore inay fahmaan qaybaha muhiimka ah ee Early Achievers oo ay taageeraan ka qaybgalka guusha leh.
- Bixin doonaa dulmar faahfaahsan oo dhanka xeerarka iyo filashooyinka Early Achievers.
- Ahaan doonaa sida qalab tixraac oo dhanka ka qaybqaadashada.

Waa masuuliyadaada ka qaybgale ahaan inaad akhrido, fahanto, oo aad raacdo tilmaamaha ku qoran dukumeentigan. CCA ee WA, wakaalada hogaanka gobolka Early Achievers, ayaa diyaar u ah inay ka jawaabto su'aalaha ama walaacyada oo ay kaa caawiyaan inaad si guul leh u hirgeliso tilmaamahan. Haddii aad bixiso adeegyada Head Start iyo/ama Barnaamijka Caawinta iyo Waxbarashada Carruurnimada Hore (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP), waxa kale oo aad su'aalo kala tashan kartaa deeq qaatahaaga ama qandaraaslahaaga.

Erayga *barnaamijka waxbarashada hore* waxaa lagu isticmaalaa dhammaan dukumeentigan si loo muujiyo xarumaha daryeelka carruurta iyo bixiyayaasha daryeelka carruurta guriga qoyska, iyo sidoo kale goobaha bixiya adeegyada Head Start iyo/ama ECEAP.

### Tilmaamaha Howlgalka Kaqaybqaataha Early Achievers oo la cusboonaysiiyay

DCYF waxay si joogto ah u cusboonaysiisaa Tilmaamaha Hawlgelinta Ka qaybqaataha. Nuqulka wakhtigan ee Tilmaamaha Shaqada (PDF) waxa laga heli karaa websaytka DCYF. Tilmaamaha Howlgalka ee la soo dhigay websaydka DCYF waxay beddelaan dhammaan noocyada hore.

Early Achievers waxay ku hawlan tahay Naqshadaynta Xoriyadda taasoo qayb ka ah habka dib u eegistayada. Iyadoo lagu salaynayo jawaab celinta iyo xogta laga helay Ka Qaybqaatayaasha Xilliga Hore, iyo sidoo kale talooyinka daneeyayaasha, DCYF waxay sii wadi doontaa cusboonaysiinta siyaasadaha sanadka soo socda. Wixii ku cusub siyaasada ama isbedelada waxaa loo diri doonaa ka qaybgalayaasha Early Achievers waxaana lagu qori doonaa websaaydka.

## Bayaanka Takoor La'aanta

DCYF iyo iskaashatooyinkeeda Early Achievers kuma takooraan cidna isirka, midabka, diinta, jinsiga, muujin ta jinsiga, da'da, waddanka qofku ka soojeedo, naafanimada, xaaladda guurka, doorashada galmada ama xaaladda ciidan ee hawlaha ama howlgallada Early Achievers ah. Iskaashatooyinka fulinta Early Achievers iyo shaqaalahoodu waxay matalaan kala duwanaanshaha gudaha Gobolka Washington waxaaana ballan ku qaadayaan inay siiyaan jawi loo dhanyahay oo soo dhawayn leh ee dhamaan ka qeybgalayaasha. Xubnaha shaqaaluhu waxay ka qaybqaataan tababbarka ku saabsan dareenka dhaqanka waxayna ku dadaalaan inay bixiyaan adeegyo iyo agab dhaqan ahaan ka jawaabaya ka qaybgalayaasha Early Achievers iyo qoysaska aad u adeegto waxaanan isla heerka anshaxa iyo ixtiraamka ka filaynaa dhammaan ka qaybgalayaasha Early Achievers. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa bogga Sinnaanta Early Achievers.

## Wargelinta Waajibka ah

Dhammaan shaqaalaha bixiya adeegyada Early Achievers, oo ay ku jiraan Khabiirada Aqoonsiga Tayada, Xiriirada Bulshada iyo Tababarayaasha, waa warbixiyeyaal qasab ah sida uu dhigayo sharciga Gobolka Washington, sidaas oo kale, waa in ay si toos ah Adeegyada Ilaalinta Ilmaha ugu soo sheegaan xaalad kasta ee xadgudubka iyo dayacaada ilmaha.

# 2. Horumarinta Tayada ee Joogtada ah

Horumarinta Tayada ee Joogtada ah (Continuous Quality Improvement, CQI) waa wadnaha Early Achievers. CQI waxay tixraacdaa nidaamka socda ee:

- Waxbarashada ku saabsan kartiyaha iyo fursadaha korriinka iyadoo la adeegsanayo ilo badan oo macluumaad.
- Dadaalka ula kaca ah ee nidaamyada hormarka tayada, sida:
    - Aasaasida qorshaha hadafyada la jiraan, waqtiyada iyo talaabooyinka ficilka.
    - Xallalka tijaabinta iyo fulinta.
    - Qiimeynta natiijada iyo dib ugu noqoshada qorshaha.

Early Achievers waxaa ka go'an CQI oo lagu dabaqayo nidaamka oo dhan:

- Barnaamijyada: Early Achievers waxay awood siisaa shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore iyo hogaaminta si ay u aqoonsadaan oo ay u gaaraan yoolalka horumarinta tayada iyadoo la kaashanayo iskaashiga tababarka. Early Achievers waxay taageertaa barnaamijyada waxbarashada hore hababka sida yoolalka la wadaago iyo qorshaynta waxqabadka, milicsiga, is-qiimaynta, iyo ka qaybgalka bulshooyinka dhaqanka.

- Iskaashatooyinka*:* Iskaashatooyinka fulinaya Early Achievers waxay ka qaybqaataan horumarinta xirfadeed ee socda. Waxay ururiyaan casharradii laga bartay ka qaybgalayaasha waxayna ku taliyaan oo ay horumariyaan horumarinta adeeg bixinta.
- Nidaamka-Gobolka**:** DCYF waxay ku tiirsan tahay jawaab celinta shuraakada fulinta, daneeyayaasha, iyo xogta kale in si joogto ah wax looga beddelo loona hagaajiyo siyaasadaha, dhaqamada, iyo taageerada ilaha.

## Dib U Qiyaasidda Early Achievers

Cudurka COVID-19 wuxuu saameyn weyn ku yeeshay nidaamka waxbarashada hore iyo barnaamijyada Gobolka Washington. Early Achievers waxay aqoonsan tahay caqabadaha horyaala barnaamijyada waxayna aqbaleen fursada dib loogu qiyaasi karo nidaamka iyadoo diirada la saarayo baahiyaha bixiyayaasha iyo dadaalka lagu hormarinayo sinnaanta qowmiyadeed. Washington waxay soo martay waddo dheer oo ku saabsan safarkeeda tayada leh. Xogta hadda jirta waxay muujineysaa in 93% barnaamijyada leh heerka tayada la soo gabagabeeyey ay gaareen Heer Tayo 3 ama ka sarreeya, 35% isbeddel wanaagsan shantii sano ee la soo dhaafay. Dhisidda guushaas, waxaan aqoonsanay saddex yool oo lagu caawinayo Early Achievers inay daboolaan baahiyaha daryeel bixiyeyaasha, kaalmeeyaan ka soo kabashada masiibada, oo noo dhaqaajiyaan dhanka mustaqbalka:

- Kordhinta hufnaanta.
- Abuuritaanka hababka farsamada si loo muujiyo tayada.
- Oggolaanshaha liiska ikhtiyaariga ah ee dabacsan si uu u gaaro heerar tayo sare leh.

Iyada oo qayb ka ah shaqadan, DCYF waxay horumarinaysaa wareegga CQI ee nidaamka Early Achievers si aan u sii wadno xoojinta nidaamka waqti ka dib jadwal joogto ah oo la saadaalin karo.

## Wareega CQI

Qof kastaa wuxuu haystaa boos uu ku koro, oo ay ku jirto nidaamka Early Achievers. DCYF waxaa ka go'an inay horumariso wareegga CQI ee nidaamka Early Achievers. Wareegan CQI waxaa ka mid ah habka fikirka dheer, dejinta yoolka, iyo ficilka noo ogolaanaya inaanu qiimayno qaybaha nidaamkayaga, siyaasadaha, dhaqamada, iyo agabka taageerada. Waxaan tan u samaynayna anagoo kaashanayna Cultivate Learning iyo CCA ee WA, iyo sidoo kale bixiyayaasha iyo daneeyayaasha kale ee gobolka oo dhan. Waanu soo dhawaynay oo aanu dhiirigelinay jawaab-celinta bixiyaha inta lagu jiro nidaamkeena dib u eegista, waxaanan ku dadaalaynaa in aan si firfircoon uga qayb gelino bixiyayaasha waxbarashada hore ee wareegga CQI ee hore u socda.

Websaaydka Horumarinta Tayada Joogtada ah ee Early Achievers wuxuu hayaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamkeena shaqada CQI iyo siyaabaha aad uga qayb qaadan karto nidaamka.

# 3. Qaabdhismeedka Aqoonsiga Tayada Early Achievers

## Guudmar

DCYF waxay u qaabaysay Qaabdhismeedka Aqoonsiga Tayada Early Achievers noocyo kala duwan oo bixiyayaasha oo ay ku jiraan goobaha waxbarashada hore ee shatiga iyo aqoonsiga leh, iyo sidoo kale goobaha bixiya adeegyada ECEAP, Early ECEAP, Head Start, iyo/ama Early Head Start ee Washington. Qaab dhismeedka waxaa ka mid ah shan heerar hoose ah. Shatiga ama shahaado bixinta waxay la mid tahay Heerka Tayada 1 waxayna dejisaa aasaaska tayada Early Achievers. Ka qaybqaadashada

barnaamijyada waxbarashada hore waxay kasban kartaa Heerarka Tayada 2 ilaa 5 iyadoo la kulmeysa Heerarka Tayada Early Achievers. Qaybta soo socotaa waxay sharraxaysaa qaab-dhismeedka Nidaamka Aqoonsiga iyo Hagaajinta Tayada, oo ay ku jirto dulmarka Shuruudaha iyo Heerarka Tayada.

## Heerarka Tayada Early Achievers

Heerarka tayada Early Achievers waxay bixiyaan hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee la wadaago si loo aqoonsado, loo taageero, oo loo wanaajiyo tayada goobaha waxbarashada hore iyo horumarinta natiijooyinka ilmaha. Waxay saldhig u yihiin heerarka tayada xarunta. Shanta goobood ee heerka tayada leh waxay la jaan qaadayaan Shatiga Xannaanada Carruurta waxaana ka mid ah:

- Bey'adda Waxbarashada
- Natiijooyinka Ilmaha
- Isdhexgalka iyo Manhajka
- Ka Qaybgalka iyo Iskaashiga Qoyska
- Kobcinta iyo Tababarrada Xirfadeed

Eeg Jaantuska 2 wixii ah tusaalayaal guud ee noocyada ku dhaqanka barnaamijka ee Heerarka Tayada waxay cabbiraan aag walba. Fadlan tixraac buug-yaraha Heerarka Tayada Early Achievers (PDF) wixii ah heer gaar ah.

*Jaantuuska 2: Aagagga Heerka Tayada – Tusaalooyin*

**Aagaga Heerka Tayada**

| | |
|---|---|
| Bay'ada Waxbarashada: 55 dhibcood | Ka qaybgalayaashu waxay kasbadaan dhibco aqoonsi markay dhamaystiraan qaybaha hoose. Waxyaabaha Aqoonisga:<br>• Xogta Barnaamijka – 20 dhibcood<br>• Muuqaalo Goos-goos ah – 5 dhibcood halkii wareeg ee muuqaal (illaa 30 dhibcood)<br>• Muuqaalka Da'da Dugsiga – 5 dhibcood |
| Natiijooyinka Carruurta: 20 dhibcood | • In caruurta la baaro si markaa loo ogaado halbeega iyo suurtagalnimada walaacyada.<br>• In la bixiyo qiimayn joogto wax looga barto kartiyaha iyo baahiyaha canug kasta oo markaa si gaar ah waxbarasho loogu sameeyo.<br>• In la wadaago warbixinta ku saabsan kobaca carruurta iyo hormarka qoysaska si ay sare ugu qaadaan u diyaarsanaanta dugsiga. |
| Isdhexgalka iyo Manhajka: 10 dhibcood | • Fullinta manhaj la jaanqaadaya Tilmaamaha Waxbarashada Hore iyo Hormarka ee Gobolka Washington.<br>• In shaqalaha la siiyo taageerada homarinta manhajka iyo is dhaxgalka macalinka iyo ilmaha. |
| Ku Hawlanaanta iyo Iskaashiga Qoyska: 10 Buundo | • La shaqaynta waalidka si loo go'aamiyo fahamka awooddaha iyo baahiyaha ilmaha.<br>• Samaynta Qorshaha Ficilka, oo ku saleysan cilmi baarista Qaabdhismeedka Xaqiiqaha Illaalada Xoojinta Qoyska. |
| Kobcinta iyo Tababarada | • Shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore iyo waxbaridda waxay leeyihiin shahaadooyinka ama aqoonsiyada Waxbarashada Caruurnimada Hore oo La xaqiijiyay ee gobolka (Early Childhood Education, ECE), digriiga |

| | |
|---|---|
| Xirfadeed: 10 dhibcood | hoose, bajelaarka ama mastarka oo ay ka sitaan dhanka ECE ama digrii ay DCYF Ansixiyay oo lagu diiwaangaliyey MERIT. |
| Aqoonsiga: 10 dhibcood | • Soo gudbi Codsiga Aqoonsiga Ansixinta.<br>• Caddayn ahaan usoo gudbi shahaado hadda jirta ama dukumeenti kale oo sheegaya in xarunta ay si buuxda ay u aqoonsatay wakaalad buuxisa shuruudaha aqoonsiga Early Achievers.<br>• Aqoonsigu waa inuu ahaadaa mid sax ah taariikhda codsiga aqoonsiga la gudbiyay. |

## Wareegyada Aqoonsiga Tayada

Si aad si wanaagsan u taageerto kobacaada socda, waxaad hadda awood u leedahay inaad la kulanto Heerarka Tayada oo aad kasbato dhibcaha aqoonsiga wakhti ka dib, iyada oo loo marayo wareegga aqoonsiga tayada. Wareegga aqoonsiga tayada wuxuu bilaabmaa markaad Codsiga Aqoonsiga Tayada ku soo gudbiso MERIT. Qaabka loo soo gudbinayo Codsigaaga Aqoonsiga Tayada waxaa laga heli karaa websaaydkeena isagoo ku qoran Ingiriis, Isbaanish, iyo Soomaali. Tallaabo kasta oo wareega ah waxay ku dhismaysaa kan ugu dambeeya, marka aad ka qaybqaadato habsocod joogto ah oo horumarineed adiga oo la kaashanaya oo taageero ka helaya tababarahaaga. Wareegga waxaa wada adeeg bixiyaha, marka waxaad qeexaysaa meelaha aad rabto inaad horumariso. Dhibcahaaga aqoonsiga si guud looma wadaago, heerarka tayadana lama dhammeeyo illaa aad doorato inaad dhammaystirto wareegga adiga oo ku dhammaystiraya Heerka Tayada dugaha MERIT.

*Jaantuuska 3: Wareega Aqoonsiga Tayada*




## Qaabdhismeedka Heerka Tayada

Early Achievers, dhammaan ka qaybqaatayaasha barnaamijyada waxbarashada hore waxay wadaagaan isla shuruudaha aasaasiga ah ee Heerka Tayada 1 waxayna helaan dhibco si loo gaaro Heerarka Tayada 2-5. Dhammaan barnaamijyadu waa inay dhammaystiraan Xogta Barnaamijka oo ay ka soo gudbiyaan laba Muuqaal oo Goos-goos ah fasalkiiba si ay u kasbadaan Heerka Tayada 3 ama ka sarreeya.

*Jaantuus 4: Dulmarka Dhibcooyinka Heerarka Early Achievers*




Barnaamijya du waxay ku kasbadaan dhibco iyagoo buuxinaya Heerarka

## 4. Bilaabida

### Guudmar

Si aad uga qaybgasho Early Achievers, dhammaan bixiyeyaasha waxbarashada hore waa inay marka hore is-diiwaangeliyaan. Ka qaybgalayaasha Early Achievers waxay heli karaan taageerooyin iyo ilo kala duwan. Marxaladaha hore ee ka qaybqaadashada waxay diiradda saaraan in la barto nidaamka Early Achievers iyada oo loo marayo la talin iyo tababar, iyo sidoo kale in wax badan laga barto falsafada, xoogga, iyo yoolalka daryeel bixiyaha iyada oo loo marayo Xogta Barnaamijka.

### U Qalmidda

Barnaamijyada waxbarashada hore ee shatiyaysan, shahaado leh ama Shahaado Ka haysta Lacag Bixinta Kaliya, Head Start, iyo goobaha ECEAP ayaa u qalma inay ka qaybqaataan Early Achievers. Dhamaan barnaamijyada waxbarashada hore ee shatiaga ama shahaadada haysta waa in ay ku jiraan xaalad wanaagsan oo dhanka shati-siinta ah si markaas ay uga qeybqaataan Early Achievers. "Xaalad wanaagsan" waxaa loola jeedaa haysashada shati aan dhacayn oo aan la hakinin, lagala noqon, ama ku sugan xaalad tijaabo ah. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha iyo waxyaabaha laga filayo ka qaybgalka ayaa laga heli karaa Cutubka 9.

## Shuruudaha Ka Soo Qaybgalka

Xeerka Dib Loo Eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 43.216.085 waxay u baahan tahay barnaamijyada waxbarashada hore ee aqbala maalgelinta gobolka si ay ula kulmaan wakhtiga ka qaybgalka. Shuruudahani waxay khuseeyaan barnaamijyada waxbarashada hore ee:

- Oggolaada lacag bixinta kaalmada ah ee loo marayo:
    - Working Connections Child Care (WCCC)
    - Daryeelka Carruurta Xilliyeed (Seasonal Child Care)
- Bixiya adeegyada ECEAP/Early ECEAP

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha waqtiga waxaa laga heli karaa Cutubka 7.

## Diiwaangelinta Early Achievers

Bixiyaha waxbarashada hore/xiriirka koowaad ayaa gali kara codsiga diiwaangelinta ee ku yaal tabka Facility/Site (Xarunta/Goobta) ee gudaha MERIT. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida la iskaga diiwaangaliyo Early Achievers ee bogga DCYF, sidoo kale lagu heli karaa luuqadaha Isbaanish iyo Soomaali. Diiwaangelinta Early Achievers waxa ku jira:

- Macluumaadka aasaasiga ah iyo dimugaraafiga ee xarunta.
- Aqoonsiga qofka ka tirsan Early Achievers ee laga la xiriirayo barnaamijkaaga.
- Linkiga Tilmaamaha Howlgalka Early Achievers. Codsadayaashu waa inay calaamadeeyaan inay akhriyeen oo ay ogolaadeen hab-raacyadan ka hor intaysan soo gudbin diiwaangelinta.
- Saxiixa elektarooniga ee codsaha.

Markaad soo gudbiso Diiwaangelinta Early Achievers, qofka laga la xiriirayo Early Achievers wuxuu heli doonaa iimayl xaqiijin ah oo ka socda DCYF oo sheegaya in barnaamijku iska diiwaan geliyay Early Achievers.

## Dadka Laga La Xiriirayo Early Achievers

Agaasimaha xarunta/adeeg-bixiyaha koowaad ee daryeelka carruurta guriga qoyska ayaa loo xilsaaraa Lala Xiriiraha Early Achievers. Lala Xiriiraha Early Achievers ayaa masuul ka ah kormeeridda iyo dhammeystirka dhammaan howlaha Early Achievers. Hadii barnaamijka waxbarashada hore meesha ay ka jiraan dhawr shaqaale maamuleed, waxaad magacaabi kartaa xiriirka labaad ee Early Achievers si loo taageero hawsha.

## Tababaridda

Dhammaan ka qaybgalayaasha Early Achievers waxay marin u heli karaan tababarida iyagoo sii maraya hay'adooda CCA ee WA ama deeq qaataha Head Start/ qandaraaslaha ECEAP. Tababariddu waa taageerada aasaasiga ah ee Early Achievers, waana qayb muhiim ah oo ka mid ah aqoonsiga tayada iyo kobaca.

### La Xiriiridda iyo La Shaqaynta Tababarahaaga

Markaad buuxiso arjiga isdiiwaangelinta Early Achievers, waxaa lagugu xiri doonaa tababarahaaga Early Achievers. Tababarayaasha Early Achievers waxay ka qaybgalayaasha ka caawiyaan inay si guul leh uga qaybqaataa una baaraan Aqoonsiga Tayada Early Achievers iyo Nidaamka Horumarinta. Tababarayaashu

waxay ku taageeraan yoolalkaaga iyo qorshayaasha hawl-qabadka iyaga oo u maraaya tababarid xiriir ku salaysan iyo tababar dhaqanka waafaqsan.

Xafiiskaaga maxalliga ee Child Care Aware ayaa kula soo xiriiri doona kuuna sheegi doono adeegyada tababarka ee jira, ama waxaad isticmaali kartaa qalabka Find My Coach (Hel Tababarahayga). Haddii goobtaadu bixiso adeegyada ECEAP/Early ECEAP ama Head Start 75% ama ka badan ee boosaska barnaamijkaaga, fadlan la xiriir qandaraaslahaaga si aad wax badan uga ogaato taageeradaada tababareed.

Goob kasta waa gaar. Waxaad leedahay awood iyo yoolalka gaar ah oo dhanka safarka tayada ee goobtaada. Tababarayaashu waxay la shaqeeyaan hogaamiyayaasha barnaamijka waxbarashada hore si ay u go'aamiyaan habka ugu wanaagsan ee loo isticmaalo ilaha tababarka si ay uga caawiyaan goobtaada inay gaarto yoolalkeeda. Shaqaale kasta oo ka qaybqaata habka aqoonsiga tayada wuxuu heli doonaa horumarinta xirfadeed ee xiriirka ku salaysan. Tirada guud ee tababarka ee uu helo barnaamijka waxbarashada hore way kala duwanaan doontaa iyadoo lagu saleynayo baahiyaha barnaamijka. Tababarayaasha iyo shaqaalaha kale ee taageerada waxay ilaalinayaan sirta gaarka ah, macluumaadka ku saabsan carruur gaarka ahna waxay ahaan doontaa qarsoodi.

## Taageerada iyo Macluumaadka Farsamo

### MERIT

MERIT waa nidaamka diiwaan gelinta shaqaalaha, waxbarashada, iyo shahaadooyinka. Lala Xiriiraha Early Achievers waa inuu hubiyaa in dhammaan shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore ay galeen diiwaanka xirfadle ee gudaha MERIT. Shaqaalahu waa in ay iyagu isku xiraan barnaamijka waxbarashada hore iyagoo galaya diiwaanadooda xirfadle ee MERIT oo gelinayo macluumaadka shaqada ee ay hadda jira. Shaqaalaha kormeerka goobta ayaa looga baahan yahay inay xaqiijiyaan diiwaanada shaqada ee MERIT iyagoo isticmaalaya boggooda xarunta/goobta ee gudaha MERIT.

Dhammaan codsiyada Early Achievers iyo taariikhda ka qaybgalka waxay ku jiraan MERIT, Diiwaanka Horumarinta Xirfadeed ee DCYF. Gudaha MERIT, ka qaybqaatayaasha waxay:

- Heli karaan heerka ka qaybgalka ee hadda jira, macluumaadka muhiimka ah, iyo xiriirada.
- Cusboonaysii Xiriirka Koowaad/Labaad ee Early Achievers.
- Ku bilow wareegga aqoonsiga tayada adiga oo soo gudbinaya Codsiga Aqoonsiga Tayada.
- Dhameey Heerkaaga Tayada.
- Iyo wax kale oo dheeraad ah!

### Shaashadda Bulshada ee Tababaraha iyo Macallinka (Coach and Educator Community Interface, CeCi)

CeCi waa qalabka aqoonsiga tayada iyo tababarida oo onlaayn ah ee Gobolka Washington (hore loo oran jiray Coaching Companion). CeCi waxaa lagu dhex daray MERIT si ay barnaamijyadu si fudud u helaan adeegyada labada nidaam. CeCi waa hab cajiib ah oo lagu wanaajiyo laguna kabo dhaqamada tababarka. CeCi waxay sahlaysa tababarka farsamada gacanta iyada oo loo marayo wareegga Tababarka oo Ku saleysan Dhaqangalin. Waxay ka kooban tahay ilo badan oo lagu taageerayo tayada waxbarashada hore ee carruurnimada. Tababarayaashu waxay la wadaagi karaan agabyada jira ama waxay geli karaan agabka ay doorteen si ay ula wadaagaan daryeel bixiyeyaasha. Tababarayaashu way isku xiri karaan

midba midka kale iyo kooxaha daryeel bixiyayaasha iyagoo abuuraya oo isticmaalaya Bulshooyinka Dhaqalgalinta. Ilaha sida webinaarada iyo talooyinka isticmaalka CeCi waxay ku yaalaan gudaha maktabadda ilaha.

CeCi waxay taageertaa horumarinta tayada iyada oo loo marayo tababbarka farsamada waxayna kaabaysaa habka aqoonsiga tayada iyadoo lagu darayo Xogta Daryeel Bixiyaha, Muuqaalo Goos-goos ah, Aqoonsiga, iyo Qaybaha Dib-u-eegista Diiwaanada ee Early Achievers.

Washington CeCi waxaa laga heli karaa https://wa-coachingcompanion.org/. Markaad ciwaan samaynayso markii ugu horeysay, fadlan isticmaal ciwaanka iimaylka shaqada, haddii aad mid leedahay, si aad akoon u samaysato. Waxa kale oo jira dhawr fiidyow oo degdeg ah oo bilaw ah oo bixiya hagitaan dhanka isticmaalka CeCi: https://wa-coachingcompanion.org/help

# 5. Wareega Aqoonsiga Tayada

## Guudmar

DCYF waxay nashqadaysay nidaamka Early Achievers si ay u taageerto Wareega Aqoonsiga Tayada joogtada ah, si tallaabo kasta oo wareeg ah ay ugu dhisato tan u dambaysa. Iyada oo loo marayo Early Achievers, bixiyaha ayaa ka qaybqaata habsocodka horumarinta ee socda isagoo caawimaad iyo taageero ka helaya tababarahooda. Ka qaybqaatayaasha ayaa hogaaminaya habka iyadoo diirada la saarayo meelaha kobaca ee adiga, daryeel bixiye ahaan, aqoonsatay. Wareegga Aqoonsiga Tayada waxa uu leeyahay saddex qaybood: Xogta Barnaamijka, Muuqaalo Goos-goos ah, iyo Dib U Eegista Diiwaanada. Xogta Barnaamijka wuxuu dhigayaa aasaaska Aqoonsiga Tayada. Muqaalada Goos-gooska ah ayaa markaa sii balaarinaya Xogta Barnaamijka, waxayna u adeegaan si ay u muujiyaan hab-dhaqannada waxbaridda ee barnaamijka dhexdiisa. Daryeel bixiyeyaasha raba inay ka sii gudbaan heerka tayada 3 (ay ku jiraan ECEAP/Bixiyeyaasha Early ECEAP) waxay soo gudbin karaan waxyaabo dheeri ah oo lagu aqoonsanayo tayada sida Dib u eegista Diiwaanada ama Muuqaalo Goos-goos ah oo dheeri ah.

Wareegga aqoonsiga tayada wuxuu bilaabmaa markaad Codsiga Aqoonsiga Tayada ku soo gudbiso gudaha MERIT. Talaabada ugu horeysa waa dhamaystirka Xogta Barnaamijka, oo ay ku xigto laba muuqaal oo goos-goos ah – tani waa shuruudaha ugu yar ee lagu gaaro Heerka Tayada 3. Tallaabooyinkan waa in la dhammaystiro ka hor intaysan goobtaadu soo gudbin caddayn dheeraad ah ama kasban dhibco Horumarin Xirfadeed. Wareeggu wuxuu dhamaanayaa marka aad kasbato tirada la rabo ee dhibcaha aqoonsiga oo aad Heerka Tayada ku dhamaystirto gudaha MERIT.

Kadib waxaad awoodi doontaa inaad soo gudbiso Codsi cusub oo Aqoonsi Tayo ah oo aadna dib u bilawdo wareegga. Heerarka Tayada waxay dhacaan seddex sano oo kasta. Waa inaad keentaa caddaynta hadda jirta inta lagu jiro wareeg kasta oo aqoonsiga tayada ah.

## Waxyaabaha Ku Jira Aqoonsiga Tayada

### Xogta Barnaamijka

Buuxinta Xogta Barnaamijku waa tallaabada ugu horreysa ee Wareegga Aqoonsiga Tayada. Xogta Barnaamijka waa fursad ay bixiyayaasha iyo qoysasku ku wadaagaan macluumaadka ku saabsan barnaamijkooda iyo inay u dabaaldegaan waxa ay ku faanaan iyo waxa ka dhigaya kuwo gaar ah. Xogta Barnaamijka ee ku saleysan cilmi-baarista waxay bixisaa jawaab celin iyo xog qiimo leh, waxay kor u qaadaa ka qaybgalka qoyska, waxayna taageertaa wareegga tababarka ee CQI.

Xogta Barnaamijka waxa uu ka kooban yahay su'aalo fikir dheer oo loogu talagalay milkiilaha/agaasimaha, shaqaalaha, iyo qoysaska si ay u dhamaystiraan. Shakhsiyaadka ayaa si madax-banaan u buuxiya su'aalaha iyada oo loo marayo sahan onlaayn ah ama waraysi lala yeesho Khabiirka Aqoonsiga Tayada. Barnaamijyada waxbarashada hore waxay codsadaan Xogtooda Barnaamijka iyagoo Codsiga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada ku soo gudbinaya gudaha MERIT. Xiriiriyahaaga Bulshada ayaa kula soo xiriiri doona marka ay gaarto wakhtigaaga si aad u bilowdo Xogtaada Barnaamijka. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa Xaashida Xaqiiqda ee Xogta Barnaamijka ee ku jirta websaaydka DCYF, oo ay la jiraan su'aalaha Xogta Barnaamijka oo loogu talagalay:

- Agaasimaha (Ingiriis | Isbaanish | Soomaali)
- Daryeel Bixiyaha Caruurta ee Guriga Qoyska (Ingiriis | Isbaanish | Soomaali)
- Macallinka (Ingiriis | Isbaanish | Soomaali)
- Qoysaska (Ingiriis | Isbaanish | Soomaali)

Marka la dhammeeyo, Warbixinta Xogta Barnaamijka waxay tababarayaasha iyo maamulayaasha barnaamijka siin doontaa fursad ay ku qorsheeyaan habka hagaajinta tayada. Waxaad si wada jir ah ula shaqayn doontaa tababarahaaga si aad u aqoonsato oo aad u abuurto yoolal ku xeeran baahiyaha barnaamijkaaga gaarka ah. Markaas,tababaridda waxay diiradda saari doontaa:

- Dhisida ama cusboonaysiinta Qorshaha Hagaajinta Tayada ee goobtaada oo ku salaysan jawaab celin.
- Hagidda adiga iyo shaqaalahaaga dhanka agabka horumarinta xirfadeed ee gaarka ah.
- In lagu la kaashadado si loo dhaqangaliyo Muqaalka Goos-gooska ah ee muujinta ku dhaqanka waxbarida.

### Muuqaalada Goos-gooska ah

Waxaan ku cabbirnaa tayada jawigaaga waxbarasho iyo isdhexgalka iyada oo loo marayo Muuqaalo Goos-goos ah. Fiidiyowgu waa muuqaal 10-15 daqiiqo ah oo ah isdhexgalka macalinka iyo ilmaha ee fasal kasta ama jawi waxbarasho. Ka dib marka barnaamijkaagu dhammeeyo Xogta Barnaamijka, waxaad bilaabi kartaa soo gudbinta Muuqaalada Goos-gooska ah. Macallimiintu waxay aqoonsadaan Tilmaamaha Waxbarashada Hore ama Kartida Muhiimka ah si ay ugu muujiyaan muuqaalkooda oo ay u qoraan milicsi gaaban. Taqasusayaasha Aqoonsiga Tayada waxay dib u eegaan fiidiyowyada iyagoo isticmaalaya qoraal ku salaysan cilmi-baaris waxayna bixiyaan jawaab celin wanaagsan oo ku saabsan meelaha iyo fursadaha koritaanka. Iyada oo loo marayo tababar ku salaysan ku-dhaqanka iyo hababka xaqiijinta dhaqameed, tababarahaagu wuxuu kula kaashan doonaa si wadajir ah dib ugu eegista si loogu dabaaldego guulaha loona abuuro yoolalka horumarinta tayada. Fiidiyowyada waa in loo soo gudbiyaa fasal ama kulan kasta oo waxbarasho hore (da'da 0-5).

Haddii barnaamijkaagu u baahan yahay taageero dheeraad ah ama aadan marka hore buuxin shuruudaha soo gudbinta fiidiyowga, waxaad heli doontaa fursad aad kula shaqayso Xiriiriyahaaga iyo Tababarahaaga Bulshada si aad dib ugu soo gudbiso fiidiyowga.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad u gudubto Heerka Tayada 3 (oo ay ku jiraan bixiyeyaasha ECEAP/Early ECEAP), markaas waxaad dooran kartaa inaad soo gudbiso Muuqaallo Goos-goos ah oo dheeraad ah. Barnaamijkaagu waxa uu soo gudbin karaa illaa afar Muuqaalo Goos-goos ah oo dheeraad ah, oo muujinaya meelo caadi ah oo dheeraad ah. Markaad soo gudbiso Muuqaalo Goos-goos ah oo dheeraad ah, waxaad kasban kartaa ilaa 20 dhibcood oo dheeri ah.

Tababaridda heerka Muuqalada Goos-gooska ah waxay sii wadaa inay raacdo qorshahaaga hagaajinta tayada waxayna u ogolaataa taageerada dhaqamada waxbarida shaqsiga ah.

- Adiga iyo tababarahaaga waxaad si wadajir ah u daawan kartaan fiidiyowyada aad soo gudbisay.
- Tababarahaagu wuxuu tababaro gaar ah iyo horumarin xirfadeed oo kale ku hagi karaa adiga iyo shaqaalahaaga oo ku salaysan jawaab celin.
- Tababarahaagu waxa uu la shaqayn karaa kooxo daryeel bixiyayaal ah si ay u taageeraan milicsiga iyo koritaanka la wadaago ee bulsho la aamini karo.

Siyaasadda Ka Reebitaanka Muuqaalada Goos-gooska ah: Bixiyeyaasha waxbarashada hore ee leh caqiido dhaqameed, diimeed ama falsafadeed taasoo mamnuucaysa duubista iyo soo gudbinta muqaalada goos-gooska ah waxay codsan karaan indho-indheyn toos ah ama dhanka khadka ah taasoo ay qabanayso Cultivate Learning. Codsiyada ka reebitaanka waa in loo soo diraa sanduuqa Early Achievers ee ah QRIS@dcyf.wa.gov waana in lagu daraa nuqul ka mid ah siyaasadaha barnaamijka ee diidaya duubista muuqaalada goos-gooska ah.

## Dib U Eegista Diiwaanada

Barnaamijyadu waxay muujinayaan dhaqamada kale iyadoo loo marayo Dib U Eegista Diiwaanada. Daryeel bixiyeyaasha waxay soo gudbin karaan caddaynta aagaga Heerka Tayada Natiijooyinka Ilmaha, Isdhexgalka iyo Manhajka, iyo Ka Qaybgalka Qoyska iyo Iskaashiga iyagoo buuxinaya Qalabka Dib u eegista Diiwaanada iyo soo galinta faylasha gudaha CeCi. Dukumeentiyada taageeraya waa inay ku jiraan caddayn qoran oo ah siyaasadaha iyo dhaqamada, sida siyaasadaha ku jira buug-gacmeedka shaqaalaha. Bixiyeyaasha ayaa dooran kara Heerarka Tayada ee ay rabaan inay u ka soo gudbiyaan caddaynta – waxay dooran karaan qaar ama dhammaan.

### *Buuxinta Qalabka Dib U Eegista Diiwaanada*

Buuxinta Qalabka Dib U Eegista Diiwaanada (Records Review Tool, RRT) waa liis hubin ee caawiya barnaamijyada waxbarashada hore iyo kooxda aqoonsiga tayada inay u diyaar garoobaan dib u eegista diiwaanada oo guul leh oo muujinaya meelo dheeraad ah oo dhanka Heerarka Tayada. RRT waxaa ku jira:

- Xulashada Heerarka Tayada ee barnaamijka waxbarashada hor uu qorsheynayo inuu muujiyo inta lagu jiro aqoonsiga tayada ee onlaaynka ah.
- Tusaalooyinka dukumeentiyada iyo faylasha uu dib u eegayo Khabiir dhanka Aqoonsiga Tayada.

Markaad dhamaystirto RRT, waxaad "doorbi doontaa" heerarka iyo dhaqamada aad qorsheynayso inaad ku muujiso caddayntaada. Haddii ay jiraan halbeegyo hab-dhaqan oo aadan meesha ku haynin, markaas waxaad ku muujisaa aaladda aad dooratay inaad "kaga baxdo" ee ka mid ah heerarkan. Waxaad dooran

kartaa doorashadan marka halbeeggu aanu la jaan qaadin falsafada barnaamijkaaga ama haddii barnaamijkaagu wakhtigan uusan lahayn qorshayaal lagu hirgeliyo heerka. Ka bixista heerka macnaheedu waa khabiirka Aqoonsiga Tayada ma raadin doono caddaynta heerkaas inta lagu jiro aqoonsiga tayada farsamada. Ka bixista heerarka waxay yarayn doontaa tirada dhibcaha lagu kasbado heerkaaga tayada ee guud.

## Hormarinta Shaqada

Waxaad sidoo kale ku heli kartaa dhibco dhanka waxbarashada shaqaalaha. Si aad u hesho dhibco dhanka waxbarashada shaqaalaha, shaqaaluhu waa inay xaqiijiyaan in macluumaadka waxbarashadooda ee gudaha MERIT uu yahay mid hadda jira oo la xaqiijiyay. Waa muhiim in barnaamijyada waxbarashada hore ay hawshan goor hore siiyaan si loo hubiyo in la helo waqti badan oo lagu ururiyo, lagu gudbiyo, dib loogu eego, loona habeeyo qoraallada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaqiijinta waxbarashada, fadlan booqo websaaydka MERIT: www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-profdev/merit

DCYF waxay xisaabisaa Kobcinta Xirfadlaha iyo dhibcaha Tababarka iyadoo ku saleysan waxbarashada lagu xaqiijiyay MERIT. Agaasimayaasha iyo shaqaalaha waxbarashadu waa inay haystaan shahaadooyinka ama aqoonsiyada, shahaadada bilowga ah, shahaadada bajelaarka, ama shahaadada mastarka ee Early Childhood Education (ECE) ee gobolku ansixiyey ee dhanka ECE ama shahaado ay DCYF oggolaatay ee lagu diiwaangeliyay gudaha MERIT. Waxaad dib u eegi kartaa dhibcahaaga Horumarineed ee Xirfadda Qaabdhismeedka Aqoonsiga Tayada ee bog-hoosaadka Early Achievers. Waa inaad buuxisaa Xogta Barnaamijka iyo laba Muuqaal oo Goos-goos ah ka hor inta aanu barnaamijkaagu u qalmin inuu helo dhibco dhanka horumarinta xirfadeed ah. Dhibcaha Horumarinta Xirfadlaha lama dhamaystirayo illaa aad buuxiso shuruudaha ugu yar oo aad dhamaystirto heerka tayadaada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan heerarka Horumarinta Xirfadeed iyo xisaabinta waxaa laga heli karaa DCYF bogga Taageerad iyo Macluumaadk ee Early Achievers.

## Aqoosiga

DCYF waxay aqoonsiyo qaran qaarkood ku dartay Early Achievers. Ka qaybgalayaasha u qalma waxay heli doonaan toban dhibcood oo dheeraad ah oo dhanka Heerkooda Tayada ee u dambeeya iyo sidoo kale Aagga Aqoonsiga ee Takhasuska ee dhanka shahaadadooda Heerka Tayada. Buundooyinka aqoonsigu ma aha kuwa dhaqangal hore leh. Si ay ugu qalmaan, daryeel bixiyeyaasha la aqoonsaday waa in:

- Si buuxda u aqoonsado hay'ad buuxisay shuruudaha aqoonsiga Early Achievers. Wakhtigan, hay'adahan waxa ka mid ah:
    - Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Da’da Yar (National Association for the Education of Young Children, NAEYC)
    - Ururka Qaranka ee Daryeelka Ilmaha Qoyska (National Association for Family Child Care, NAFCC)
    - Ururka Ameerikaanka ee Montessori (American Montessori Society, AMS)
    - National Accreditation Commission (Gudida Shahaado Siinta Qaran, NAC)
    - AdvancED
- Soo bandhigo shahaado hadda jirta ama dukumeenti kale inta lagu jiro aqoonsiga tayada oo sheegaysa in xarunta si buuxda ay u siisay hay'ad buuxisa shuruudaha aqoonsiga Early Achievers. Tani waxaa lagu dhamaystiri karaa gudaha CeCi.

### Dib U Eegista Qaybta

Shaqaalaha Aqoonsiga Tayada ayaa si dhow ula shaqayn doona adiga iyo tababarahaaga iyo kooxda hubinta tayada gudaha si loo hubiyo saxnaanta dib u eegista dhammaan cadaymaha. Haddii aad aaminsantahay in lagu siiyay tiro dhibco ah oo khaldan qayb kasta oo ka mid ah qaybaha aqoonsiga tayada, fadlan iimayl u dir QRIS@dcfy.wa.gov adigoo wata macluumaadka ku saabsan qaybta su'aasha, tirada dhibcaha aad aaminsan tahay inay ahayd in lagu siiyo, iyo macluumaad kasta oo dheeraad ah 30 maalmood gudahood laga bilaabo markaad hesho dhibcaha qaybtaas.

## Shaqaalaha Taageerada Aqoonsiga Tayada

### Taageerada Tabobarka

Taageeradan la habeeyey waxay diiradda saartaa horumarinta iyo taageeridda yoolalka barnaamijka, u diyaarinta waxqabadyada aqoonsiga tayada, iyo horumarinta tayada joogtada ah.

Tababariddu waxay u baahan tahay ka qaybqaadashada hoggaanka barnaamijka waxbarashada hore iyo macallimiinta fasalka. Tilmaamaha Horumarinta Waxbarashada Hore waxay caawiyaan hagista dhaqamada ugu fiican ee ku saabsan ku dhaqanka waxbarida, habaynta iyo dayactirka jawiga waxbarashada. Waa muhiim inaad fahamto sida agabyadani u qeexayaan hababka ugu fiican iyo sida loo taageero shaqaalahaaga markay ka shaqeynayaan horumarinta tayada.

### Xiriiriyeyaasha Bulshada iyo Khabiirada Aqoonsiga Tayada

Kooxda Aqoonsiga Tayada ee Cultivate Learning waxay ka kooban yihiin Xiriiriyeyaasha Bulshada (Community Liaisons, CLs) iyo Khabiirada Aqoonsiga Tayada (Quality Recognition Specialists, QRSs). Xiriiriyayaasha Bulshada waxay si dhow ula shaqeeyaan goobaha iyo tababarayaasha ka qaybqaata si loo hubiyo inaad hesho taageero shakhsiyeed inta lagu jiro habka aqoonsiga tayada. QRSs-ka Cultivate Learning waa xirfadlayaal aqoon sare u leh waxbarashada hore kuwaas oo sameeya indho-indheyn oo abuura warbixinnada xogta oo loogu talagalay adiga iyo tababarahaaga si aad u adeegsataan markaad ka shaqaynayso hawlaha horumarinta tayada. Cultivate Learning waxaa ka go'an horumarinta sinnaanta. Dhammaan CLs iyo QRS-yadu waxay dhammaystiraan tababbar waafaqsan dhaqanka, waxayna sameeyaan dib u milicsi iyo dib u eegis joogto ah si ay u hubiyaan isla xisaabtanka dhanka dadaalka ay ugu jiraan horumarinta sinnaanta.

## Qorshaha Hagaajinta Tayada (QIP)

Ka qeybqaatayaasha waxay hadafyo la sameeyaan tabarayaashooda iyagoo eegaya natiijooyinka qiimaynta barnaamijka waxbarashada hore oo ay ku jiraan:

- Ray'yi celin ka timid Xogta Barnaamijka iyo Muuqaalada Goos-gooska ah.
- Qaybaha Dib U Eegsita Diiwaanada, Tilmaamaha Horumarinta Waxbarashada Hore, ama Awoodaha Muhiimka ah.
- Guud ahaan Heerka Tayada ee barnaamijka waxbarashada hore.

Hadafyadani waxay ka koobnaan doonaan barnaamijka waxbarashada hore ee QIP. Tababarayaasha waxay ka qaybqaatayaasha ka caawin doonaan in ay fasiraan xogta qiimaynta si ay u soo saaraan QIP kaasi oo lagu ogaanayo kartiyada barnaamijka oo lagaga jawaabayo aagagga korriinka. QIP wuxuu ku dhaqmaa sida qorshe loogu talagalay nidaamka joogtada ee socda ee horumarinta tayada waxayna jaheyneysaa shaqada barnaamijka waxbarashada hore iyo tababaraha.

# 6. Heerka Tayada

## Dhameey Heerkayga Tayada

DCYF ayaa go'aamisa heerka tayada barnaamijkaaga waxbarashada hore iyadoo ku saleysan dhibcaha aad kasbatay inta lagu guda jiray wareega Qqoonsiga Tayada ee saddexda sano ah. Waxaad dhibco ku helaysaa inta lagu guda jiro wareega adoo soo gudbinaya qaybaha aqoonsiga tayada si loogu sameeyo dib u eegis iyo ra'yi celinta. Marka Cultivate Learning ay dib u eegto qayb kasta, waxaad heli doontaa jawaab celin waxaadna heli doontaa dhibco. Tani waxay la macno tahay in aad waqti ka dib hesho dhibco oo aad had iyo jeer ogaan doonto inta dhibcood ee aad haysato inta lagu jiro habka. Waxaad xogtan ka heli kartaa bog-hoosaadka Qaab-dhismeedka Tayada ee MERIT. Markaad gaarto dhibcaha looga baahan yahay heerka tayada aad rabto inaad gaarto, markaas waxaad ku dhammayn kartaa heerkaaga tayada gudaha MERIT waxaadna heli kartaa heerkaaga tayada ee laguu qoondeeyay.

## Shuruudaha U Qalmitaanka Dhamaystirka Heerka Tayada

Si aad ugu qalanto Dhamaystirka Heerka Tayada, barnaamijkaaga waxbarashada hore waa inuu:

- Buuxiyaa Xogta Barnaamijka.
- Haysto ruqsad aan dhacsanayn oo xaalad wanaagsan ku jirta.
- Ku Guulayso Heerka Tayada 3 ama ka saraysa:
    - Dhameystir ugu yaraan 2 Muuqaal oo Goos-goos ah ah (2 muuqaal deegaan kasta oo wax lagu barto)

## Meelaynta Heerka Tayada

### Go'aaminta Heerka Tayada

DCYF waxay go'aamisaa Heerka Tayada Early Achievers iyadoo lagu saleynayo tirada dhibcaha lagu helay qaybaha aqoonsiga tayada sida Xogta Barnaamijka iyo Muuqaallada Goos-gooska ah ee la dhammeeyay intii lagu jiray Wareegga Aqoonsiga Tayada. QRSs waxay ururiyaan oo ay falanqeeyaan xogtaada barnaamijka waxbarashada hore, waxay bixiyaan jawaab celin waxayna go'aamiyaan dhibcaha qayb kasta. DCYF waxay muujisaa tirada dhibcaha la kasbaday waxayna xisaabisaa dhibcahaaga iyo heerka tayada Early Achievers ee lagu saadaaliyay gudaha MERIT. Markaad dhammayso dhammaan Qaybaha Qqoonsiga Tayada ee barnaamijka waxbarashada hore ee aad rabto inaad u soo gudbiso wareega oo aad ku qanacdo tirada dhibcaha la kasbaday, waxaad ku dhammayn kartaa heerkaaga tayada dugaha MERIT.

### Dhamaynta Heerka Tayada

Marka heerkaaga tayada la dhammeeyo, waxaad u baahan doontaa inaad ku soo gudbiso Codsi cusub oo Aqoonsiga Tayada gudaha MERIT si aad u bilowdo ka shaqaynta Wareegga Aqoonsiga Tayada ee soo socda. DCYF waxay Shahaadooyinka Heerka Tayada Early Achievers iimayl ugu diri doontaa barnaamijkaaga waxbarashada hore bisha ku xigta markaad dhamaystirto Heerka Tayada. Shahaadooyinku waxay muujinayaan Heerka Tayada Early Achievers ee barnaamijka waxbarashada hore, iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan awoodaha barnaamijka waxbarashada hore, ama Meelaha Takhasuska. Bixiyeyaasha aqbala kaalmada, heerarka tayada sidoo kale waxay go'aamiyaan Abaalmarinta Hagaajinta Tayada iyo qaddarka magdhawga ah ee u qalma barnaamijyada waxbarashada hore.

## Aaga Taqasuska

Meelaha Takhasuska waxay aqoonsadaan tayada sare ee meelaha diirada la saaray. Macluumaadkani wuxuu ka caawin karaa qoysaska inay wax badan ka bartaan barnaamijkaaga markay u raadinayaan barnaamijka waxbarashada hore ee qoyskooda. Abaalmarinada DCYF ee Meelaha Takhasuska oo ku salaysan wadarta dhibcaha laga helay aag kasta oo Heer Tayo ah.

*Jaantuuska 5: Aaga Taqasuska*

| | |
|---|---|
| Bey'adda Waxbarashada | • La siiyo daryeel bixiyeyaasha kasbaday 40 ka mid ah 55ka dhibcood |
| Natiijooyinka Ilmaha | • La siiyo daryeel bixiyeyaasha kasbaday 14 ka mid ah 20ka dhibcood |
| Isdhexgalka iyo Manhajka | • La siiyo daryeel bixiyeyaasha kasbaday 7 ka mid ah 10ka dhibcood |
| Ka Qaybgalka iyo Iskaashiga Qoyska | • La siiyo daryeel bixiyeyaasha kasbaday 7 ka mid ah 10ka dhibcood |
| Kobcinta iyo Tababarrada Xirfadeed | • La siiyo daryeel bixiyeyaasha kasbaday 7 ka mid ah 10ka dhibcood |
| Aqoosiga | • Lagu abaalmariyo xarumaha haysta aqoonsiga la xaqiijiyay, ee hadda jira ee hay'ad aqoonsi oo la aqoonsan yahay |

## Daabacaadda Heerka Tayada Early Achievers

Hadafka muhiimka ah ee Early Achievers waa in la siiyo macluumaadka ku saabsan daryeelka ilmaha iyo tayada waxbarashada hore si looga caawiyo inay sameeyaan doorashooyin laga warqabo. Heerarka Tayada Early Achievers waxa la heli karaa 30 maalmood ka dib marka Heerka Tayada loo sii daayo bixiyaha iyadoo la adeegsanayo qalabka raadinta onlaaynka ah ee Hubinta Daryeelka Caruurta ee DCYF si loo aqoonsado ka go'naanta ka qayb qaadashada barnaamijyada waxbarashada hore oo loo siiyo macluumaadkan qoysaska. Shabakadda CCA ee WA iyo CCA ee Xarunta Wicida Qoyska ee WA waxay sidoo kale bixiyaan Heerarka Tayada.

## Wareega Aqoonsiga Tayada

Heerarka tayada Early Achievers waxay shaqeynayaan saddex sano laga bilaabo taariikhda dhammaystirka ee ugu dambeysay. Inta lagu jiro muddadan, barnaamijkaaga waxbarashada hore waa inuu joogteeyaa ka qaybqaadashada firfircoon iyada oo loo marayo ka-qaybgalka hawlaha horumarinta tayada ee socda iyo soo gudbinta qaybaha aqoonsiga tayada muddada wareegga saddexda sano ah. Isla marka uu barnaamijkaaga waxbarashada hore uu dhamaystiro Codsiga cusub ee Aqoonsiga Tayada ee boggaaga gudaha MERIT ee xarunta/goobta, waxaad bilaabi kartaa ka shaqaynta qaybaha aqoonsiga tayada ee wareegga xiga, adigoo ka bilaabaya Xogta Programkaaga ee xiga. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa hoos qaybta Cusbooneysiinta Heerka Tayada.

## Cusnoonaysiinta Heerkayga Tayada

Si aad u ilaaliso heerka tayada hadda jira, waa in aad dhamaystirtaa wareega aqoonsiga tayada cusub oo aad dhamaystirtaa heer tayo cusub saddexdii sanaba mar. Maadaama ay jiraan qaybo badan oo ka mid ah qaabka aqoonsiga tayada, waxaad u baahan doontaa inaad dhamaystirto hawlahan wakhti ka dib inta lagu jiro wareegga saddexda sano ah. Waa inaad dhammaystirtaa heerkaaga tayada ka hor sannad-guuradaada aqoonsiga tayada saddexda sano ah. Iyadoo ay sabab u tahay masiibada COVID-19 iyo hakadka ku yimid aqoonsiga tayada awgeed, Codsiga Aqoonsiga Tayada ee la gudbiyay (oo hore u ahaa Codsiga Qiimaynta Goobta Early Achievers) ayaa hadda ilaalinaysa kaalmada barnaamijkaaga iyo/ama u-qalmitaanka ECEAP.

### Habka Cusboonaysiinta

- DCYF waxay iimayl u diri doontaa Xiriirka Early Achievers ee barnaamijkaaga waxbarashada hore 12 iyo lix bilood ka hor barnaamijkaaga waxbarashada hore sanad guuradii heerka seddexaad ee tayada xasuusin ahaan si aad u soo gudbiso Codsiga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada ama si loogu dhamaystiro heerkaaga tayada gudaha MERIT.
- Xiriirka Early Achievers wuxuu dhamaystiri karaa heerkooda tayada wakhti kasta ilaa iyo inta ay ka soo baxeen shuruudaha u qalmitaanka.

## Dib U Soo Gudbinta Heer Tayo oo La Cusboonaysiiyey

Ka qaybgalayaasha Early Achievers ee la qiimeeyey ee aan buuxin heerka tayada loo igmaday ama ay rabeen waxay haystaan ilaa 12 bilood kadib taariikhdoodii ugu danbaysay ee heerkooda tayada si ay u codsadaan oo ay dib ugu soo gudbiyaan heerka tayada la cusboonaysiiyay.

### U Qalmitaanka Dub U Soo Gudbinta

Si dib loogu soo gudbiyo aqoonsiga tayada iyo dhamaystirka heerka tayada la cusboonaysiiyay ee bilaashka ah, ka qaybgalayaashu waa inay buuxiyaan mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Inaysan gaarin Heerkooda Tayada ee loo baahnaa.
- Inay Bixiyaan Adeegyada ECEAP/Early ECEAP ama Head Start.
- Oggolaadaan lacag-bixinta kaalmada ee ka imaaneysa:
    - Working Connections Child Care (WCCC)
    - Daryeelka Carruurta Xilliyeed (Seasonal Child Care)

Dib u soo gudbinta aqoonsiga tayada waxay kaa caawin kartaa inaad gaarto heerka tayada shaqada ee nooca barnaamijkaaga (RCW 43.216.085). Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu dhameeyo heer tayo oo la cusboonaysiiyay laakiin uusan weli gaarin heerkii tayada ee loo xilsaaray, waxa aad codsan kartaa dib u soo gudbin lacag ah si loo aqoonsado tayada.

Bixiyeyaasha aan aqbalin maalgelinta gobolka waxay codsan karaan dib u soo gudbin lacag ah si loo aqoonsado tayada.

### Habka Dub U Soo Gudbinta

*Jaantuska 6: Dib u soo gudbinta Heer Tayada La Cusboonaysiiyay*




### Maxay ka dhigan tahay in Dib loo soo gudbiyo Aqoonsiga Tayada?

Dib u soo gudbinta Aqoonsiga Tayada way ka duwan tahay bilawga Wareegga Aqoonsiga Tayada cusub. Dib u soo gudbintu waxay kuu oggolaanaysaa inaad ku sii shaqeyso Wareegga Aqoonsiga Tayada ee hore intii aad bilaabi lahayd Wareegga Aqoonsiga Tayada oo cusub. Haddii aad u qalanto dib u soo gudbinta, waxaad dib u heli doontaa gelitaanka Qaab-dhismeedka Aqoonsiga Tayada ee gudaha MERIT ee aad dhammaystirtay dhawaanahan. Barnaamijkaaga waxbarashada hore waxaa laga yaabaa in uu kasbado dhibco dhanka Heerka Tayada ee loo baahan yahay adiga oo dib u soo gudbiya Qaybaha Aqoonsiga Tayada iyo buuxinta Heerarka Tayada. Jadwalka hoose wuxuu muujinayaa qaar ka mid ah faraqa ugu muhiimsan ee hababka:

| Heerka Tayada ee Asalka ah | Heerka Tayada ee La Cusboonaysiiyey |
|---|---|
| Waa in lala bilaabaa Xogta Barnaamijka | Wuxuu dib u adeegsadaa Xogta Barnaamijka ee horay u jiray |
| Waa in lagu soo gudbiyaa hal ama ka badan oo Muuqaalo Goos-goos ah | Waxaa lagu soo gudbin karaa Muuqaalo Goos-goos ah oo dheeraad ah, illaa lix guud ahaan |
| Waxaa lagu soo gudbin karaa qaybo dheeraad ah si dhibco loogu helo | Waxa laga yaabaa in lagu gudbiyo qaybo dheeraad ah oo Dib u eegis Diiwangelineed, ama lagu soo gudbiyo caddayn dheeraad ah (sida siyaasadda la cusboonaysiiyay) si loo helo dhibcaha aan la helin |
| Seddex sano ayaa lagu dhammaystiraa | 12 bilood ayaa lagu dhammaystiraa |

## Howlaha Sixidda

Haddii aad u adeegto carruurta qaata kaalmada ama aad bixiso adeegyada ECEAP/Early ECEAP oo aanad buuxin heerkaaga tayada ee lagaaga baahan yahay, markaa waa inaad ka qaybqaadataa waxqabadyada hagaajinta. Hawlahani waxay kaa caawin karaan inaad kor ugu qaaddo tayada wakhtiga si aad dib ugu soo gudbiso heerka tayada la cusboonaysiiyay oo aad ilaaliso kabida gobolkaaga ama maalgelinta ECEAP/Early ECEAP.

### Shuruudaha Kaqeybqaataha Howlaha Sixidda

Waxaad haysataa 12 bilood laga bilaabo taariikhda heerkaaga tayada la dhammeeyey si aad u dhamaystirto hawlaha hagaajinta oo aad u gaarto heerka tayada laguu igmaday. Fadlan la shaqeey

tababarahaaga iyo/ama shaqaalaha kale ee taageerada si aad u soo gudbiso caddayn dheeraad ah si aad u buuxiso heerka tayada aad u baahan tahay.

### Tallaabooyinka Xiga ee La Soo Jeediyey

Waxaan kugula talineynaa falalka soo socda si ay kaaga caawiyaan markaad ka shaqeyneyso heer tayo oo la cusboonaysiiyay:

- Dib u eeg xogtaada heerka tayada oo la wadaag macluumaadka lagu dabaqi karo shaqaalaha 60 maalmood gudahooda markaad hesho.
- La shaqee tababarahaaga si aad u ogaatid meelaha aad jeclaan lahayd inaad dib ugu soo gudbiso Qaybaha Aqoonsiga Tayada dheeraadka ah.
- Abuur ama cusboonaysii QIP horay u jiray si aad u qeexdo sida aad u qorshaynayso inaad ku kasbato dhibcaha dheeraadka ah ee loo baahan yahay si loo gaaro heerka tayada aad rabto.
- Hubi in QIP-gaagu uu qeexayo doorarka iyo masuuliyadaha xubnaha shaqaalaha, iyo sidoo kale wakhtiga aad soo gudbinayso caddayn dheeraad ah.

### La xisaabtanka Tababaraha iyo Ka Qaybgalaha

Adiga iyo tababarahaagu waa inaad diiwaan gelisaan ka qaybqaadashadaada firfircoon ee hawlaha hagaajinta. Midan ayaad samayn kartaa adigoo:

- Cusboonaysiiya QIP-gaaga si loogu daro dhammaan qoraalada la xiriira horumarka barnaamijkaaga waxbarashada hore inta lagu jiro hawlaha hagaajinta.
- Si joogto ah ula hubiya tababarahaaga. Dib u eega horumarka aad adiga iyo shaqaalahaagu ka samayseen yoolalkaaga. Hubi inaad haysato agabka aad u baahan tahay si aad si guul leh ugu horumariso tayada.
- Shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore ee muhiimka ah waa inay ka qaybqaataan tababbarka fiidiyowg ah ugu yaraan hal mar bishii.

## Barnaamijyada Waxbarashada Hore Ee Aan Doonayn Inay Dhamaystiraan Heer Tayo

Haddii aadan aqbalin kaalmada oo aadan bixin adeegyada ECEAP, markaas lagaagama baahna inaad dhammaystirto heerka tayada. Haddii aadan si firfircoon ugu lug lahayn waxqabadyada horumarinta tayada iyo/ama ka shaqaynta xagga heerka tayada, adiga iyo shaqaalaha barnaamijkaaga waxbarashada hore waxa laga yaabaa inaad xaddidan tahay helitaankiina taageerooyinka tababarka Early Achievers iyo agabyada kale.

## Ka Noqoshada Dhamaystirka Heerka Tayada

Haddii aad si khalad ah u dhamaystirto heerkaaga tayada, waxa aad codsan kartaa in aad ka noqoto heerka la dhammaystiray 30 maalmood gudahooda laga bilaabo marka la dhammaystiray. Samaynta sidaas waxay kuu ogolaanaysaa inaad sii wadato shaqada qaabdhismeedkaaga aqoonsiga tayada oo aad soo gudbiso cadaymo dheeraad ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan iimayl u dir QRIS@dcyf.wa.gov.

# 7. Shuruudaha Waqtiga

## Guudmar

RCW 43.216.085 waxay u baahan tahay barnaamijyada waxbarashada hore ee aqbala maalgelinta gobolka si ay ula kulmaan wakhtiga ka qaybgalka. Shuruudahani waxay khuseeyaan barnaamijyada waxbarashada hore ee:

- Oggolaada lacag bixinta kaalmada ah ee loo marayo:
    - Working Connections Child Care (WCCC)
    - Daryeelka Carruurta Xilliyeed (Seasonal Child Care)
- Bixiya adeegyada ECEAP/Early ECEAP

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha ayaa laga heli karaa websaaydkeena bogga Supports & Resources (Taageerada iyo Ilaha) (Ingiriis | Isbaanish | Soomaali). Faahfaahinta ku saabsan wakhtiga barnaamijkaaga iyo marxaladaha muhiimka ah waxaa laga eegi karaa bog-hoosaadka Early Achievers ee bogga Xaruntaada/Site ee gudaha MERIT.

## Sharuudaha Jadwalka

### Saamaynta COVID-19 ee Shuruudaha Jadwalka

Waxaan fahamsanahay in COVID-19 uu saameyn ku yeeshay ka-qaybgalka bixiyeyaasha iyo awoodda ay kula kulmi karaan waqtiyada Early Achievers. Macluumaad gaar ah oo ku saabsan saamaynta COVID-19 ee shuruudaha jadwalka, fadlan booqo websaaydkeena ama iimayl u dir QRIS@dcyf.wa.gov.

### Daryeel Bixiyeyaasha Goor Dhow Aqbalaya Kaalmada

Daryeel bixiyeyaasha dhowaan aqbalaya kaalmada* waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

- Iska diiwaangeliyaan Early Achievers 30 maalmood gudahood oo ka bilaabaneyso helidda lacagta kaalmada koowaad.
- Ku buuxiyaan Codsiga Aqoonsiga Tayada 12 bilood gudahooda laga bilaabo diiwaangelinta Early Achievers ama lacag bixinta kaalmada koowaad, hadba midkii danbeeya.
- Inay helaan Heerka Tayada 3 ama ka sareeya 30 bilood gudahooda ee diiwaangelinta Early Achievers ama lacag bixinta kaalmada koowaad, hadba midkii danbeeya. Barnaamijka waxbarashada hore ee aan ku gaarin Heerarka Tayada 3 gudaha wakhtigan uma banaana inuu helo kaalmada daryeelka ilmaha ee gobolka ilaa Heerka Tayada ee loo baahan yahay la buuxinayo.
- Ilaali barnaamijka waxbarashada hore ee ugu dambeeyey ee Heerka Tayada 3 ama ka sareeya adiga oo dib u cusboonaysiinaya Heerkooda Tayada saddexdii sanaba mar.

**Daryeel bixiye kasta oo bilaaba inuu aqbalo lacag bixinta kaalmada 12 bilood ama ka badan isagoon aqbalin kaalmada waxa loo aqoonsan yahay daryeel bixiye kaalmo cusub*

Daryeel bixiyeyaasha kaalmada ee hela Heerka Tayada 2 waa inay la shaqeeyaan macalinkooda si ay u dhamaystiraan hawlaha hagaajinta oo ay helaan Heerka Tayada 3 ama ka sareeya 12 bilood gudahooda laga bilaabo bilaabidda hawlaha hagaajinta. Bixiyeyaasha kabida ee jira ee aan helin Heerarka Tayada 3 ama ka sareeya 12 bilood gudahooda laga bilaabo bilawga hawlaha hagaajinta ma sii yeelan doonaan kabida daryeelka ilmaha ee gobolka ilaa heerka tayada loo baahan yahay la buuxinayo.

### Wakhtiga Goobta Bixinta Adeegyada ECEAP/Early ECEAP

Dhamaan bixiyayaasha u adeega ECEAP/Early ECEAP waa inay:

- Isku diwaangeliyaan Early Achievers 30 maalmood gudahooda laga bilaabo bilowga adeegyada ECEAP/Early ECEAP.
- Helaan Heerka Tayada 4 ama ka sareeya 24 bilood gudahooda laga bilaabo bilawga bixinta adeegyada ECEAP/Early ECEAP.
- Ilaaliyaan Heerka Tayada 4 ee hadda jira ama ka sareeya iyaga oo dib u cusboonaysiinaya Heerkooda Tayada saddexdii sanaba mar.

Bixiyeyaasha u adeegaya ECEAP ee hela Heerka Tayada 2 ama 3 waa inay la shaqeeyaan macalinkooda si ay u dhamaystiraan hawlaha hagaajinta oo ay helaan Heerka Tayada 4 ama ka sareeya 12 bilood gudahooda laga bilaabo bilaabidda hawlaha hagaajinta. Bixiyeyaasha ECEAP ee aan helin Heerka Tayada 4 ama ka sareeya 12 bilood gudahooda ee bilaabay hawlaha hagaajinta waxay halis ugu jiraan inay waayaan qandaraaskooda si ay u bixiyaan adeegyada ECEAP.

*Jaantus 7: Jadwalka Barnaamijyada Waxbarashada Hore ee Hela Maalgelinta Gobolka*




## Qorshaha Kordhinta Jadwalka

Balaadhinta Early Achievers waxay u sahlaysaa ka qayb galayaasha inay helaan lacagta kaabista iyo/ama adeegyada Barnaamijka Waxbarashada iyo Kaalmada Caruurnimiada Hore ( Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP) si ay u dalbayaan hal mar, kordhin lix bilood ah oo shuruudaha mudada ah. Kordhinta lagama helo wakhti 30 maalmood ah oo la iska dhaafo qaybta guditaanka ee lagu sheegey RCW 43.216.710. Bixiyayaashu waxay u baahan karaan in loo kordhiyo ilaa 12 bilood kahor inta

ayna gaadhin halbeega heerkooda tayada ama wakhtiga hawlaha la bixiyo.

## Sharuuda Kordhinta Xaq u lahaanshaha

Bixiyayaasha waxbarashada hore ee doonaya inay dalbadaan kordhinta halbeega heerka tayadu waa inay:

- Soo gudbiyaan Arjiga Kordhita Early Achievers (Ingiriisi | Isbaanish | Somali) kahor taariikhda halbeega Heerka/bixinta.
- Si buuxdo ugu hogaansamaan dhammaan shuruudaha shati-siinta iyo ECEAP/ECEAP Hore, haddii ay quseyso.
- Buuxinta dhamaan shuruudaha Early Achievers oo ay ku jiraan ku biirida iyo buuxinta Dalabka Aqoonsiga Tayada Early Achievers.
- Buuxinta shuruudaha ka qayb galka firfircoon. Sharaxa buuxa ee ka qayb galka firfircoon waxa uu ku yaalaa Tilmaamaha Shaqada Ka Qayb Galka Early Achievers (Ingiriisi | Isbaanish | Somali).
- Xaalada laga soo reebo ee kala duwan ee lala kulmo (hoos ka eeg sharaxa).

Bixiyayaasha aan doonaynin inay isticmaalaan kordhintooda halka mar ah waxay dalban karaan dib u dhig, taas oo hoos ku gelinaysa kuyuuga aqoonsiga yada, maadaama oo ay jiraan xaalada hal mar ah halkii wareeg ee aqoonsiga tayada. Fadlan la xidhiidh Wakiilka Bulshada Waxbarashada wixii macluumaad dheeraad ah.

## Qeexista “Xaalado Gaar ah”

Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxay bixin doontaa kaliya kordhin deeqda ah hadii bixiyaha waxbarashada hore uu soo bandhigo "xaalad gaar ah" oo siinaysa wakhti dheeraad ah oo uu kusoo gabo gabeeyo heerka tayada. Xaaladahan goonida ah waxa ka mid ah:

- Isbeddelada hoggaanka ee goobta shaqada — agaasimaha, caawiyaha agaasimaha ama kormeeraha barnaamijka.
- Isbeddelada hoggaanka ururka — isbeddelada xubinnimada Golaha Qabaa'ilka, ama hoggaamada hay'adaha kale.
- Isbeddelka sameeyo ee shaqaalaha xarunta daryeelka carruurta, barnaamijka Head Start ama ECEAP- in kabadan boqolkiiba 30% ee shaqaalaha hogaaminayo, sida lagu qeexay MERIT, way isbedaleen lixdii bilood ee la soo dhaafay (tani waxay ku xadidantahay shaqaalaha la shaqeeyo carruurta dhalashada ilaa 5 sanno jirka iska badelayo).
- Isbeddelka shaqaalaha ee daryeelka carruurta guriga - caawiyaha daryeelka carruurta qoyska ama shaqaalaha hoggaan ah ayaa isbeddelay saddexdii bilood ee la soo dhaafay.
- Masiibada dabiiciga ama waxyeelada shilka ee xarunta soo gaadha oo u baahan dayactir xirfadle.
- Dhacdooyinka bulshadu qeexday, hab-nololeedka hooseeya, mushkiladaha xilliyada — sida munaasabadda, safarka laashka.
- Xarunta waxay kala howlgashaa nidaamka cabashada DCYF, CCA ee WA ama hay'ada kale ee bixineysa taageerada Early Achievers.
- U rarida goobta Head Start ama ECEAP meel saamayn karta nidaamyada aqoonsiga tayada.
- Jirrada mudada dheer ee agaasimaha, bixiyaha daryeelka carruurta guriga, ama macalinka hogaanka.
- Wax ka yar sadex caruur ah oo u dhaxaysa dhalashada iyo 5 jir halkee deegaan waxbarashada hore ayaa ku biira xarunta daryeelka ilmaha.
- Wax ka yar hal ilme ah oo u dhaxaysa dhalashada iyo 5 jir halkee deegaan waxbarashada hore ayaa ku biira daryeelka ilmaha qoyska.
- Dhimashada ama masiibo kale oo saameyn weyn ku leh shaqaalaha barnaamijka ama qoysaska.

- Xaaladaha kale ee la oggolaan karo waxaa loo eegayaa dacwad-dacwad.
    - Xaaladahaan, xaruntu waa in ay bixisaa dokumentiyo muujiyo baahida loo qabo kordhin. Dokumentiyadaan waxa dib-u-eegay guddida ee Reebanida/Kordhinta si loo go'aansado haddii xaaladaha oggolaanayaan kordhin. Gudida waxaa kamid noqon doona shaqaalaha DCYF iyo Child Care Aware of Washington iyo xubinta Gudi Hoosaadka Taageerada Bixiyaha.

### Nidaamka lagu Codsanayo Mudo Kordhinta

Bixiyayaashu waa inay u hogaansamaan mar walba shuruudaha wakhtiga ay gudbinayaan foomka Arjiga Kordhinta Early Achievers. Arjiga waa inuu la socdaa macluumaadka soo socdaayi:

- Sababta loo codsanayo kordhinta.
- Guudmarka qaybqaatayaasha Early Achievers iyo howlaha tayada horumarka.
- Dokumentiyada xaqiijinaya codsiga (tusaale, waraaqaha dhaqaatiirta, waraaqaha joojinta, imw.)

Shaqaalaha DCYF Early Achievers ayaa qiimayn doona dalabaadka kordhinta oo dhan oo way ansixin doonaan hadii ay buuxiyaan shuruudaha hore ugu dagsan ee ku qoran arjiga. Hadii xaalada gaarka ah ee bixiyuhu ayna ku jirin liiska hore loo sameeyay, gudida DCYF ayaa qiimayn doonto dalabkaaga. Gudida waxaa kamid ah xubnaha shaqaalaha DCYF Nidaamka Qiimaynta iyo Hormarinta Tayada (Quality Rating and Improvement System, QRIS), xubinta shaqaalaha ee CCA ee WA, iyo xubinta Gudi Hoosaadka Bixiyaha iyo/ama Kooxda Shaqo ee Qiimaha iyo Nidaamka Early Achievers. Gudidu waxay qiimayn doontaa dalabka oo waxay taageeri doontaa cadaymaha si loo go'aamiyo hadii bixiyhuhu u qalmo kordhinta. Iimeel ka socda sanduuqa QRIS ayaa sheegi doona hadii DCUF ay ogolaatay ama diiday dalabka kordhinta oo waxaa kamid ah macluumaadka talaabada xigta.

# 8. Taageerooyinka iyo Abaalmarinda Ka Qaybgalaha

## Guudmar

Early Achievers waxaa ku jira taageerooyin iyo abaalmarino kala duwan si looga caawiyo ka qaybqaatayaasha dadaalada horumarinta tayada ka qeybqaadashadaada oo dhan. Waxaan u qaabaynnay taageerooyinkan iyo dhiirigelintan si ay kaaga caawiyaan hirgelinta yoolalka, kordhinta tayada barnaamijkaaga waxbarashada hore, oo ugu dambayntiina loo hagaajiyo natiijooyinka ilmaha.

## Adeegyada Tababarka

Tababariddu waa adeeg joogto ah oo muddo dheer ah oo lagu bixiyo kharash la'aan gudaha Early Achievers si ay kaaga caawiyaan inaad fahamto siyaasadaha Early Achievers oo aad si guul leh ugu socoto nidaamka. Hay'adaha gobolka ee CCA ee WA ayaa bixiya inta badan adeegyada tababarka. Haddii 75% ama in ka badan boosaska barnaamijkaaga loo qoondeeyay adeegyada Head Start ama ECEAP/Early ECEAP, markaas waxaad ka heli kartaa adeegyada tababarka dhanka deeq qaataha/ qandaraaslaha.

Waxaad heli kartaa tababarka haddii aad si firfircoon uga qayb qaadanayso Early Achievers. Ka qaybqaadashada firfircoon macnaheedu waa in barnaamijkaaga waxbarashada hore uu ka jawaabo xiriirka, si buuxda uga qaybqaato, oo muujiyo koboca barnaamijka oo ku salaysan la la talin iyo tababar. Hadafyada tababarka waa in:

- Kor loogu qaado horumarinta xirfadeed ee ku salaysan xiriirka.

- Lagaal qaybgalo wadahadalo kor u qaadaya sinnaanta oo si wanaagsan u beddela dhaqamada.
- Lagu siiyo agab oo laguna taliyo horumarinta xirfadeed.
- Lagu taageero marka aad dhex socoto nidaamka Aqoonsiga Tayada.
- La caawiyo adiga iyo shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore si aad u fahantaan Heerarka Tayada Early Achievers.
- Lagaa caawiyo inaad fahanto oo aad isticmaasho Heerka Tayada Early Achievers iyo xogta qiimeynta.
- Si loo taageero yoolalkaaga barnaamijka iyo abuurista QIP-yadaada.

Waxaad ku heli doontaa adeegyada tababarka siyaabo badan, oo ay ku jiraan booqashooyinka goobta, iimaylka, wicitaanada taleefanka, fadhiyada kooxda, iyo tababarida farsamada ee CeCi. Waxaa laga yaabaa inaad si gaar ah ula shaqeyso tababarahaaga ama kulammo kooxeedyo yar oo looga hadlayo mawduucyo taageera horumarinta tayada joogtada ah iyo hababka ugu fiican.

## Dhalashada ilaa 3 Hindisaha Tayada

Gobolka Washington iyo DCYF waxaa ka go'an inay kordhiyaan saadka iyo tayada daryeelka carruurta da'doodu tahay dhalashada illaa 3 jir. Early Achievers waxay taageero ku saleysan xiriirka gaarka ah siisaa macalimiinta la shaqeysa carruurta da'doodu tahay dhalashada illaa 3 jir. Shabakadda tababarayaasha takhasuska leh ee dhallaanka iyo socod-baradka ayaa bixiya tababar dhanka khadka ama toos ah illaa barnaamijyada daryeelka iyo waxbarashada hore ee guriga iyo xarunta ku saleysan .

### U Qalmidda

Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu bixiyo adeegyada carruurta da'doodu tahay dhalashada illaa 3 jir kuwaas oo helaya lacagaha kaalmada gobolka, markaas waxaad u qalantaa inaad codsato tababarka fasalka diirada saaraya kooxda tababarka dhallaanka iyo socod-baradka.

### Taageerada iyo Tababaridda Gaarka ah

Tababarayaasha dhalashada illaa 3 jir waxay si wada jir ah ula shaqeeyaan tababarayaasha Early Achievers si ay u taageeraan macalimiinta la shaqeynaya carruurta ka yar 3 sano. Qaar kamid ah adeegyada ay bixiyaan waxa ku jira:

- Taageerada iyo agabka Baaritaanka Koritaanka si kor loogu qaado baarista korriinka guud ee da'da dhalashada illaa 5 jir. Ka qaybgalayaashu waxay u qalmaan tababbarka STARS ee bilaashka ah iyo qalabka baarista korriinka.
- La-talinta Caafimaadka Maskaxda ee Dhallaanka iyo Carruurnimada Hore si kor loogu qaado korriinka bulsheed iyo shucuureed iyo dhaqamada adag.
- Tababar fiidiyoow ah oo awoodaha ku salaysan si loo taageero adeeg diirran, ka jawaab celin leh iyo soo celinta isdhexgalka dadka waaweyn iyo carruurta. Ka qaybgalayaashu waxay u qalmaan tababbarka STARS ee bilaashka ah.
- Horumarinta xirfadeed ee ku salaysan xiriirka iyo bulshooyinka ku dhaqanka si kor loogu qaado Barnaamijka Daryeelka Ilmaha Socod-baradka ah.

## Deeqaha iyo Minxooyinka Horumarinta Xirfadeed

Deeqaha waxbarasho iyo minxooyinka ayaa loo heli karaa ardayda ka shaqeysa barnaamijyada waxbarashada hore ee Early Achievers si ay u sii wataan shahaadooyinka si fudud loo kaydin karo ee

gobolka, shahaadooyinka bilowg ah, iyo shahaadooyinka bajelaarka ee ECE. Minxooyinka Early Achievers iyo Deeqaha Waxbarasho ee Washington ee Xirfadlayaasha Xannaanada Caruurta waa laba il oo kaalmo dhaqaale oo dhanka ardayda ah oo ay DCYF siisay mudnaanta ardayda ay u shaqaalayso barnaamijyada waxbarashada hore ee Early Achievers. Deeq waxbarasho ee walba waxay leedahay shuruudo u qalmitaan iyo lacago maaliyadeed oo kala duwan. Waxaad wax badan oo ku saabsan deeqahan ka ogaan kartaa on websaaydka DCYF qaybta Professional Development (Horumarinta Xirfadeed).

### Deeqaha Waxbarashada Child Care Aware of Washington

Deeqaha waxbarashada ee CCA ee WA waxa lagu xoojinayaa taageerada waxbarashada macalinka ee ka shaqaynaya digriiga BA ee ECE. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan deeqdan waxbarasho bogga CCA ee WA.

### Guddiga Gobolka ee Kulliyadaha Farsamada iyo Bulshada ee Early Achievers

Guddiga Gobolka ee Kulliyadaha Farsamada iyo Bulshada ayaa maamula Deeqaha Early Achievers. Barnaamijka deeqdani waxa uu caawiyaa shaqaalaha ku jira barnaamijyada waxbarashada hore ee Early Achievers in ay raadiyaan dhibcooyinka ECE ee ku wajahan shahaadooyinka iyo digriiga billowga ah ee ECE ee sida fudud loo kaydin karo ee gobolka. Haddii aad xiisaynayso deeqaha Early Achievers, la xiriir meesha lagala xiriiro kuleej kasta oo ka qaybqaata si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo codsado. Waxaad ka heli kartaa Barta Xiriirka iyo macluumaadka kale ee qiimaha leh Bogga Qorshaynta Xirfadda Waxbarashada Hore ee hoostimaada bogga “Find a Degree” (Raadi Shahaado), iyo sidoo kale bogga Guddiga Gobolka ee Kulliyada Farsamada iyo Bulshada.

## Wakhtiga Beddelka

Bixiyeyaasha daryeelka carruurta guriga qoyska iyo bixiyeyaasha xarunta daryeelka ilmaha waxay heli karaan wakhtiga siideynta iyagoo isticmaalaya Waqtiga Bedelka Daryeelka Hore iyo Waxbarashada ee Washington. Ka qaybgalayaasha Early Achievers waxay heli karaan waqtiga beddelka ah si ay u taageeraan koritaankooda Early Achievers. Gelitaanka wuxuu ku xiran yahay helitaanka maalgelinta.

Dhammaan beddelada waxay buuxinayaan heerarka hadda jira ee macallinka hoggaaminaya barnaamijka shatiga leh, waxay dhammeeyeen tababbarka DCYF, waxyna haystaan Hubinta Taariikhda ee La qaadan karo oo la dhameeyey. Waxaad booqan kartaa websaydka DCYF ee bogga Horumarinta Xirfadeed si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waqtiga beddelka.

## Deeqaha Baahiyada Ku saleysan

Haddii aad u baahan tahay lacag aad ku gadato agab ama tababar, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto Deeqaha Ku Salaysan Baahida. Deeqda Baahida Ku Saleeysan waxay diyaar uyihiin taageerista ka qaybgalayaasha barnaamijka waxbarashada hore ee ka qaybgalaya Early Achievers si ay uga caawiso soo iibsiga qalabka manhajka, qalabka wax lagu barto, iyo sahayda, horumarinaha dhallaanka-socodbaradka, qalabka, iyo/ama horumarinada deegaanka ee horumarinta tayada barnaamijka. Barnaamijku wuxuu u qalmaa hal mid oo ka mid ah Deeqda Ku Salaysan Baahiyaha sannad-maaliyadeed kasta (Luulyo 1-Juun 30). Haddii aad la kulanto shuruudaha u qalmitaanka, waxaad kala shaqayn kartaa tababarahaaga si aad u diyaariso oo aad u gudbiso Codsiga Deeqaha Ku salaysan Baahiyaha qaab onlaayn ahaan ah WA Compass (Ingiriis). Waxaad ka heli kartaa Isbaanish iyo Soomaali codsiyada waraaqaha ah ee la turjumay iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Deeqaha Ku saleysan Baahiyaha bogga Taageerada iyo Ilaha ee websaaydka DCYF.

## U Qalmitaanka Deeqaha iyo Mudnaansiinta

Si aad ugu qalanto, ka qaybgalayaasha Early Achievers waa inay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

- Inaad iska diiwaan gelisay Early Achievers oo aad gudbisay Xogta Barnaamijka, ama
- Inaad iska diiwaan gelisay Early Achievers oo aad leedahay Heerka Tayada oo dhameystiran ee 2, 3, 3+, 4 or 5

  **IYO** inaad buuxiso ugu yaraan mid ka mid ah waxa soo socda:

- Ka duwaangashan tahay barnaamijka cuntada Heerka 1, ama
- Ku nooshahay gudaha degmada oo u adeegta ugu yaraan 20% carruurta dakhligoodu hooseeyo iyadoo lagu saleynayo xogta Office of Superintendent of Public Instruction (OSPI) (macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo go'aamiyo haddii degmadaadu buuxisay shuruudahan, fadlan booqo qaybta Su'aalaha Inta badan La Isweydiiyo ee hoose)

**Mudnaansiinta**

DCYF mudnaan ayey siin kartaaa codsiyada. Marka DCYF ay mudnaan siinayso codsiyada, waxay tixgeliyaan:

- Ka qaybgalayaasha bixiya adeegyada carruurta aan da'da dugsiga gaarin ee helaya WCCC, marka la qiyaaso boqolkiiba carruurta helaya adeegyada xarunta ama daryeelka carruurta guriga qoyska.
- Ka qaybgalayaasha soo bandhigay barnaamij dhaqan kala duwan leh.

## Qeybinta Lacagaha Deeqda

DCYF waxay qaybisaa abaal-marinaha deeqaha ku salaysan baahiyaha inta u dhaxaysa 30 iyo 60 maalmood laga bilaabo taariikhda ay DCYF ansixisay codsigaaga deeqda ee la dhammaystiray ee barnaamijka waxbarashada hore.

- Barnaamijkaaga waxbarashada hore waa inuu lahaadaa Lambarka Iibiyaha Gobolka oo dhan si uu u helo Maalgalinta Deeqaha ku Salaysan Baahida. Barnaamijkaaga waxbarashada hore waa in uu isu diwaan galiyo iibiye ahaan ka tirsan Gobolka Washington adiga oo soo gudbiya foomka Diiwaangalinta Lacag-qaataha ee Gobolka oo Dhan iyo W-9 si aad u hesho Lambarka Iibiyaha Gobolka oo dhan. Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu ku guuldareysto inuu macluumaadkan siiyo DCYF, uma qalmi doontid inaad hesho abaal-marin deeq ah.

## Isticmaalada la Oggolaan karo ee Lacagaha Deeqda

Waxa laga yaabaa inaad u isticmaasho lacagta deeqda ah si aad uga caawiso iibsashada manhajka iyo agabka waxbarashada, saadka, qalabka, hagaajinta ilmaha iyo socod baradka, hagaajinta deegaanka, dib u cusboonaysiinta yaryar ee xaruntaada xanaanada ilmaha taageerooyinka iyo agabka ama adeegyada daryeelka caruurta baahiyaha gaarka ah qaba, ama walxaha kale sida uu u aqoonsaday tababarahaagu.

## Xannibaadyada

Lacagaha abaal-marinta uma isticmaali kartid si aad u iibsato alaabta loo arko inay:

- Horumarinada Raasamaalka: Tan waxaa ku jira iibsashada ama hagaajinta dhulka iyo gadashada, dhismaha, ama hagaajinta joogtada ah ee dhismayaasha. Intaas waxa laga reebaa hagaajinta

muhiimka u ah in ay buuxiyaan shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada, oo ay ku jiraan hagaajinta biyo-galinta, dayactirrada korontada, beddelidda dhulka rifmay, beddelidda dahaarka dhulka ama qalabka bannaanka ee halista ah, dayactirka saqafka, ama gelinta dab-xakameyn ama nidaamka digniinta albaabka.

- Adeegyada Diineed: Lacagta deeqda uma isticmaali kartid ujeeddo diimeed ama hawl kasta, oo ay ku jiraan cibaado ama waxbarasho.
- Kaararka Hadiyadda: Lacagaha deeqda ah uma isticmaali kartid si aad ugu iibsato wax u dhigma sida kaararka hadiyadda, jeegaga safarka, ama dalabaadka lacagta.

Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu helo Deeqda Baahiyaha Ku saleysan, waxaa lagaa rabaa inaad haysatid rasiidhadaada muddo toddobo sano ah, DCYF waxaa laga yaabaa inay ku weydiisato inaad bixiso risiidhadan. Waxaad ka heli kartaa dulmar ku saabsan deeqaha ku saleysan Baahiyaha websaydka DCYF bogga Taageerada iyo Ilaha (Ingiriis | Isbaanish | Soomaali).

## Lacag Celinta Kaalmada ee Heerarka leh

Ka qaybgale ahaan, haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu u adeego carruurta helaysa kaalmada WCCC ama Daryeel Xilliyeedka, waxaad heli doontaa 2% korodhka heerka gunnada kaalmada. Ka qaybqaatayaasha aqbala lacag bixinta kaalmada waa in ay soo gudbiyaan Codsiga Aqoonsiga Tayada ama u hormaraan Heerka Tayada ee 3 ama ka sareeya 30 bilood gudahooda laga bilaabo marka aad isku diwaan galiyaan Early Achievers ama aad soo gudbiso qaansheegtaada kaalmada ee koowaad, mid kasta oo dambeeya, si aad usii wado u qalmitaankaaga kaalmada iyo lacag celinta heererka leh. Haddii barnaamijkaagii hore ee waxbarashada uu ka noqdo oo haddana dib isaga diiwaangeliyo Early Achievers, 30-ka bilood ee wakhtiga wuu sii soconaya iyadoo lagu salaynayo taariikhda isdiiwaangelintaada koowaad.

Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu helo Heer Tayo 3 ilaa 5 oo carruurta aad u adeegto helayaan kaalmada WCCC ama Kaalmo Xilliyeedka, waxaad u qalantaa inaad kasbato lacag celin heerkeedu sareeyo oo lagu daray heerka aasaasiga ah sida soo socota, wuxuu dhaqangalay Luulyo 1, 2021:

Daryeelka caruurta ee guriga qoyska:*

- Heerka Tayada 3: 12% ka sarreeya heerka aasaaska ah
- Heerka Tayada 3+: 15% ka sarreeya heerka aasaaska ah
- Heerka Tayada 4+: 17% ka sarreeya heerka aasaaska ah
- Heerka Tayada 5: 20% ka sarreeya heerka aasaaska ah

**Qiimayaasha lacag celinta heerka daryeelka carruurta guriga qoyska waxaa ka xaajooda SEIU 925.*

Xarunta daryeelka carruurta:

- Heerka Tayada 3: 8% ka sarreeya heerka aasaaska ah
- Heerka Tayada 3+: 8% ka sarreeya heerka aasaaska ah
- Heerka Tayada 4+: 15% ka sarreeya heerka aasaaska ah
- Heerka Tayada 5: 20% ka sarreeya heerka aasaaska ah

Qiimayaasha magdhowga kala sarreeya waa korodh boqolley ee qiimaaha seeska ee wakhti kasta oo la sheego. Mar kasta oo sicirka aasaaska ah uu kordho, DCYF waxay ku dabaqaysaa abaalmarinta lacag celinta waa heerka aasaaska ee ugu sareeya.

DCYF waxay bixisaa lacag celin heersare ah bisha oo dhan waxayna ku salaysan tahay heerka tayada barnaamijkaaga waxbarashada hore maalinta kowaad ee bisha adeega. Waxaad heli doontaa lacag-celintaada heerarka leh bisha ka dambeysa bixinta qiimaha kabka aasaasiga ah oo loogu talagalay isla muddadaas.

## Abaalmarinada Wanaajinta Tayada

DCYF waxay bixisaa Abaalmarinta Horumarinta Tayada (Quality Improvement, QI) ee u qalmitaanka ka qaybgalayaasha Early Achievers ee u adeega carruurta hesha kaalmada daryeelka ilmaha ee gobolka oo haysta Heerka Tayada ee hadda jira. Abaalmarinta QI waxay aqoonsanaysaa guushaada waxayna taageertaa barnaamijyada waxbarashada hore si loo hirgeliyo yoolalkaaga hagaajinta tayada.

### Ujeeddada Lacagaha Abaalmarinta

Waa inaad isticmaashaa Abaalmarintaada QI si aad u gaarto yoolalkaaga hagaajinta tayada ee aad ku qeexday QIP-gaaga. Adiga iyo tababarahaaga waxaad ka wada shaqayn kartaan si aad u diiwaan geliso QIP-gaaga oo aad hubiso in ay la socoto Heerarka Tayada Early Achievers.

### U Qalmidda Abaalmarinta

Si aad ugu qalanto helitaanka Abaalmarinta QI, barnaamijyada waxbarashada hore waa inay:

- Ku Guulaystaan Heerka Tayada 3 ama ka saraysa. Bixiyeyaasha daryeelka carruurta guriga qoyska kuwaas oo ah Heerka Tayada 2 ama ka sareeya ayaa laga yaabaa inay u qalmaan Abaalmarinta QI.
- U adeegaan dadka diiwaangashan oo ugu yaraan 5% wadarta mugga shatiga haysataa ay ka kooban tahay carruurta aan gaarin da'da dugsiga ee helaya kaalmada gobolka ama kaalmada kale ee daryeelka carruurta ee u qalmay.[1]
    - Oo ujeedada xisaabinta, DCYF waxay sharaxdaa “carruurta helayo kaalmada gobolka” si loo micneeyo carruurta qaata maalgelinta gobolkaee daryeelka ilmaha iyadoo laga helayo mid kamid ah barnaamijyada soo socda:
        - WCCC
        - Daryeelka Carruurta Xilliyeed (Seasonal Child Care)
        - Kabka daryeelka ilmaha ee ay maalgeliso Medicaid, ECLIPSE, degmooyinka, kulliyadaha ama jaamacadaha, dugsiyada degmada, ciidamada, ama ururada qabaa'ilka ee federaalku aqoonsan yahay ayaa sidoo kale lagu dari karaa xisaabinta waana inaad u gudbisaa macluumaadkan QRIS@dcyf.wa.gov.
- Ogolow inaad abuurto QIP adiga oo kaashanaya tababaraha laguu dhiibay lix bilood gudahood laga bilaabo Codsiga Heerka Tayada. Haddii aadan haysan QIP lix bilood ka dib markaad hesho heerkaaga tayada, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad dib u bixiso Abaalmarinta QI.
- Ilaali ka qaybqaadashada firfircoon ee saddexda sano ah inta lagu jiro Wareegga Aqoonsiga Tayada adiga oo ka qayb qaadanaya oo ka shaqaynaya yoolalka loo dejiyay QIP ee barnaamijkaaga waxbarashada hore.
- Isku diiwaangeli iibiye ka tirsan Gobolka Washington ahaan adigoo foomka Diiwaangelinta Lacag Qaataha Gobolka oo dhan iyo W-9 u gudbinaya DCYF. Waa inaad ku buuxisaa diiwaangelinta

[1] Iyada oo lala gorgortamayo SEIU 925, caruurta da'da dugsiga iyo caruurta aan gaarin da'da dugsiga ee isticmaala kaalmada waa la eegayaa marka la xisaabinayao 5% ee shuruuda kaalmada ah ee daryeel bixiyayaasha daryeelka caruurta guriga ee qoyska.

magaca barnaamijka waxbarashada hore; DCYF shaqsiyaadka kuma abaalmarin doonto lacagaha Abaalmarinta QI. Dhammaan barnaamijyada waxbarashada hore waa inay soo gudbiyaan diiwaan gelinta lacag qaataha iyo W-9 ka hor intaysan helin abaal-marin lacageed. Ku guuldarreysiga sameynta sidaas waxay lumineysaa abaalmarinta sannadkaas ee QI.

- DCYF waxay xisaabisaa boqolleyda carruurta qaata kaalmada gobolka ee barnaamijkaaga iyadoo u qaybisa celceliska tirada carruurta ee helaya kaalmada gobolka barnaamijkaaga waxbarashada hore oo ay u adeegto awoodda shatiga ee bisha ee celceliska barnaamijkaaga waxbarashada hore.
- Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Abaalmarinta QI iyo sida loo xisaabiyo Dukumintiga Guudmarka Abaalmarinta QI.

## Qiimaha Abaalmarinta Hagaajinta Tayada

DCYF waxay u qaybisaa Abaalmarinta QI sanad walba iyadoo loo eegayo nooca bixiyaha sida soo socota:

*Jaantus 8: Qiimaha Abaalmarinta Horumarinta Tayada Xarunta Xannaanada Caruurta*

**Qiimayaasha Abaalmarinta Horumarinta Tayada ee Xarunta Daryeelka Caruurta**

| Heerka 3 | Heerka 3+ | Heerka 4 | Heerka 5 |
|---|---|---|---|
| $5,000 | $5,000 | $7,500 | $9,000 |

*Jaantuska 9: Qiimaha Abaalmarinta Horumarinta Tayada Xannaanada Caruurta ee Guriga Qoyska*

**Qiimayaasha Abaalmarinta Horumarinta Tayadaee Daryeelka Caruurta Guriga Qoyska**

| Heerka 2 | Heerka 3 | Heerka 3+ | Heerka 4 | Heerka 5 |
|---|---|---|---|---|
| $1,000 | $2,750 | $2,750 | $3,000 | $3,250 |

## Qeybinta Lacagaha Abaalmarinta

DCYF waxay qaybisaa Abaalmarinta QI ku dhawaad 60 maalmood ka dib taariikhda sii deynta heerka tayada barnaamijkaaga waxbarashada hore. Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu dhameeyo Heerka Tayada ee La Cusboonaysiiyay illaa heer tayo sare leh inta lagu jiro Wareegga Aqoonsiga Tayada oo aad horay u heshay Abaalmarinta QI ee sanadka, waxaad heli doontaa lacag bixinta farqiga u dhexeeya heerarkaaga hore iyo kan hadda kadib taariikhda sii daynta heerka tayada ee la cusbooneysiiyay. Wadarta lacag bixinta Abaalmarinta QI ee sanadlaha ah kama badnaan doonto qaddarka barnaamijkaaga waxbarashada hore ee heerka ugu sarreeya ee tayada la dhammaystiray sanadkaas. Barnaamijkaaga waxbarashada hore waxa uu heli doonaa lacagta abaal marin buuxda ee heerka tayada la cusboonaysiiyay sannad kasta oo ka harsan wareegga aqoonsiga tayada, illaa iyo inta ay ku sii jiraan u qalmitaanka helitaanka abaalmarinta.

## Isticmaalada la Oggol Yahay

Waxaad kaliya u isticmaali kartaa lacagaha Abaalmarinta QI qaybaha soo socda, oo ku salaysan Heerarka Tayada Early Achievers, oo la jaanqaado yoolalkaaga QIP ee hadda:

- Natiijooyinka Ilmaha: Waxaa laga yaabaa inaad u isticmaasho lacagta agabka, qalabyada iyo ilo si aad u taageerto qiimaynta ilmaha ee socota iyo baaritaanka korriinka.
- Manhajka Barnaamijka Waxbarashada Hore, Deegaanka Waxbarashada, iyo Is-dhexgalka: Waxaa laga yaabaa inaad u isticmaasho lacagaha si aad u xoojiso oo aad u horumariso awooda barnaamijkaaga waxbarashada hore si aad u bixiso tayo sare, khibrado iyo deegaan shaqsiyeed ee loogu talagalay caruurta ee dhinacyada soo socota:
    - Agabyada Barnaamijka/Fasalka: Tusaalooyinka shayada la aqbali karo waxaa ka mid ah agab koriinka ku habboon, alaabta lagu ciyaaro ee waxbarashada, iyo qalabka lagu taageerayo waxbarashada iyo habsocodka aasaasiga ah.
    - Manhajka: Tusaalayaasha sheyada la oggolaan karo oo ay ku jiraan hagayaasha manhajka, buuggaagta tixraaca iyo ilaha kale ee kaba manhajka.
    - Ilaha Qiimaynta Kormeerka: Tusaalayaasha sheyada la oggolaan karo oo ay ku jiraan qalabyada adiga iyo/ama shaqaalahaaga ka caawiya in ay dokumenti gareeyaan korriinka iyo koboca carruurta oo kordhiya awoodda shaqaalaha si loogu gaar yeelo barnaamijaynta carruurta. Waxaa kale oo aad u isticmaali kartaa lacag si aad u iibsato qalab iyo agab taageero si aad u qiimayso tayada dhaqamada waxbarashada hore.
- La Shaqaynta iyo Wada Shaqaynta Qoyska:
    - Waxbarashada Waalidiinta/Barnaamijka Caawinaada: Waxaad adeegsan kartaa si aad u taageerto dhaqangalinta taageeridda iyo waxbarashada waalidka.
    - Xoojinta Dhaqangelinta Qorshaha Ficilka ee Qoyska: Waxaa laga yaabaa inaad u isticmaasho lacagaha si aad u xoojiso oo aad u horumariso shaqada barnaamijka waxbarashada hore ee qoysaska iyadoo lagu salaynayo natiijooyinka Xoojinta Qorshaha Ficilka ee Qoyska. Tusaalaasha sheyada la oggolaan karo waxa ku jira khayraadka waxbarashada waalidka iyo agabka tababarka; agabka barnaamijka si loogu abuuro qoysaska jawi soo dhaweny leh; iyo kulamada bulshada/waxbarashada/munaasabadaha qoysaska.
- Kobcinta iyo Tababarrada Xirfadeed:
    - Kobcinta Shaqaalaha: Waxaa laga yaabaa inaad u isticmaasho dhaqaalaha horumarinta xirfadda shaqaalaha oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn tababarka shaqaalaha iyo shirarka. Fiiro gaar ah: Waxaad u isticmaali karta lacagta diwaan galinta/waxbarashada/qalabka kaliya, umana isticmaali kartid lacagaha safarka, huteelka, ama kharashyada imaanshaha ee la xiriira.
    - Kordhinta Mushaharka: Waxaad u isticmaali kartaa kordhinta kaabidda mushaarka shaqaalaha. Lacagaha deeqaha loogu ma talogalin in ay maalgeliso mushaharka macalimiinta, caawiyaha agaasimaha, ama agaasimaha si buuxda.
    - Gunnooyinka Shaqaalaha: Waxaad lacagta u isticmaali kartaa si aad u siiso gunnooyinka shaqaalaha.
    - Waqtiga Sii Daynta: Waxaad u isticmaali kartaa lacagta shaqaalaha si ay ugu lug yeeshaan waxqabadyada hagaajinta tayada ee ka baxsan baaxadda caadiga ah ee shaqada. Tusaaleyaasha waxaa ka mid ah, ku badalashada mushaharka, qorsheynta

waqtiga fasalka ka baxsan ee macalinka hogaamiyaha, iyo ka qaybqaadashada hawlaha iskaashiga qoyska.
    - Sii Wadida Waxbarashada: Waxaad u isticmaali kartaa lacagaha xagga shaqada koorsada dhibcaha leh ee shaqaalaha. Waa inaad marka hore sahamisaa fursadaha deeqaha waxbarasho ee Early Achievers ee jira (Deeqaha waxbarasho ee WA iyo Deeqaha Early Achievers) ee lagu sheegay qeybtan Deeqaha-waxbarasho ee Horumarinta Xirfadeed ka hor inta aanad u isticmaalin lacagaha QI ujeedadan.
- Teknoolojiydda: Waxaad u isticmaali kartaa Abaalmarinta QI xagga tignoolajiyada taageerta hirgelinta barnaamijka waxbarashada hore ee yoolalka QI, oo ay ku jiraan kombiyuutarada, sooftweerada, kamaradaha, iyo kamaradaha muuqaalka.
- Dub U Soo Gudbinta Lacagta Lagu Bixiyo: Waxaad u isticmaali kartaa Abaalmarinta QI xagga kharashka dib u soo gudbinta si aad u buuxiso shuruudaha heerka tayada ee barnaamijkaaga hore.

## Xannibaadyada

Marka laga soo tago shuruudaha kor lagu sheegay, lacagaha abaal-marinta waxaa laga yaabaa inaadan u isticmaalin Abaalmarinta QI si aad u iibsato alaabta loo arko inay:

- Horumarinada Raasamaalka: Tan waxaa ku jira iibsashada ama hagaajinta dhulka iyo gadashada, dhismaha, ama hagaajinta joogtada ah ee dhismayaasha. Intaas waxa laga reebaa hagaajinta muhiimka u ah in ay buuxiyaan shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada, oo ay ku jiraan hagaajinta biyo-galinta, dayactirrada korontada, beddelidda dhulka rifmay, beddelidda dahaarka dhulka ama qalabka bannaanka ee halista ah, dayactirka saqafka, ama gelinta dab-xakameyn ama nidaamka digniinta albaabka.
- Adeegyada Diineed: uma isticmaali kartid Abaalmarinta QI ujeeddo ama hawl kasta oo diineed, oo ay ku jiraan cibaado ama waxbarasho.
- Kairarka Hadiyadda: Lacagaha QI uma isticmaali kartid si aad ugu iibsato wax u dhigma sida kaararka hadiyadda, jeegaga safarka, ama dalabaadka lacagta.
- Uma isticmaali kartid Abaalmarinta QI si aad u soo celiso barnaamijkaagii waxbarashada hore ee iibsigii aad samaysay ka hor inta aanad helin lacagta abaalmarinta.

## Diiwaangelinta iyo Ka Warbixinta

DCYF mas'uul kama ahan warbixinta canshuur kasta ama mas'uuliyadda maaliyadeed ee laga yaabo inay khuseyso ka qaybgalayaasha dooranaya inay aqbalaan abaal-marinaha QI. DCYF waxay ku talinaysaa inaad la xiriirto xisaabiyaha, xisaab hubiyaha, iyo/ama lataliyaha maaliyadeed ee barnaamijkaaga waxbarashada hore si aad u hesho hagitaan ku saabsan warbixinta maaliyadeed.

Barnaamijyada waxbarashada hore Early Achievers ee helay miisaaniyadda Abaalmarinta QI waxaa laga doonaya inay:

- Diiwaangaliyaan sida barnaamijkaaga waxbarashada hore uu u isticmaalay Abaalmarinta QI si uu u taageero yoolalkaaga QIP.
- Hayaan dhammaan dokumeentiyada oo ay ku jiraan warqadaha diiwaanka, rasiidhada, iyo waraaqaha la xiriira sida loo isticmaalay kharashka Abaalmarinta QI ee goobta ugu yaraan toddoba sannadood.
- Haystaan QIP ee hadda jira lix bilood gudahood laga bilaabo marka la sii daayo Heerka Tayada.

### Si xun u Isticmaalka Lacagaha

Haddii aad si xun u isticmaasho lacagahaaga Abaalmarinta QI, DCYF waxaa laga yaabaa inay isla markiiba ka joojiso barnaamijkaaga waxbarashada hore ee Early Achievers sida lagu qeexay Shuruudaha iyo Waxyaabaha laga filayo Ka qaybgalka: Nidaamka Cayrinta. DCYF waxay ku qeexday *ku takri falka lacagaha* sida isticmaalka lacagaha wax iibsi kasta oo aan ku jirin Isticmaalka Lacagaha La Oggolyahay; u isticmaalka lacagaha wax iibsi kasta oo ku jira Xaddidaad; iyo isticmaalka lacagaha ujeeddooyin aan la xiriirin barnaamijka barashada hore ee QIPs.

## Agabka Suuqgaynta iyo Gaarista

DCYF waxay ku dhiirigelisaa ka qaybgalayaasha Early Achievers inay go'aankooda tayada la wadaagaan qoyska iyo bulshada. DCYF waxay samaysay agab, oo ay ku jiraan buug-warbixineed, warqad muunad ah oo qoysaska loo diro, iyo shahaado dhanka Heerka Tayada, si looga caawiyo barnaamijyada waxbarashada hore oo uu la jiro xiriir. Waxaad la wadaagi kartaa ka qaybqaadashadaada Early Achievers adiga oo gelaya agabka wacyigelinta ee qiimaha badan ee laga heli karo onlayn ahaan halkan https://www.childcarebizedge.org/successful-program-management/marketing-your-program/. Intaa waxaa dheer, waxaad isticmaali kartaa agabyada ku jira Qalabka Qorshaha Suuqgeynta si aad u taageerto barnaamijkaaga.

### Isticmaalka iyo Soo Saarista Agabka Gaarista ee Early Achievers

DCYF waxay kugu dhiirigelinaysaa inaad ka qaybqaadashadaada Early Achievers iyo sida ay kaaga go'an tahay tayada la wadaato qoyska iyo bulshada, labadaba onlaayn ahaan iyo agabkaaga oo daabacan. Waxaa lagugu soo dhawaynayaa inaad isticmaasho ka qaybqaadashadaada Early Achievers agabka suuqgeyneed ee adiga kuu gaar ah oo wata tilmaamahan soo socda.

### Websaytka Barnaamijka Waxbarshada Hore

Ka qaybgale Early Achievers ahaan, waxaad dhigi kartaa summada Early Achievers websaaydkaaga ganacsiga waa haddii aad isticmaasho astaanta iyo weedha "Waxaan nahay Kaqeybgale Early Achievers" oo uu la socdo linkiga bogga Early Achievers ee websaaydka DCYF. Tani waa isticmaalka kaliya ee summadda ee loo oggol yahay websaydka barnaamijka waxbarashada hore.

Waa inaad ogeysiisaa DCYF markaad summada Early Achievers ku isticmaasho boggaaga ganacsiga ee barnaamijka waxbarashada hore. Adiga iyo isku duwaha gobolkaaga waa in aad DCYF kula soo xiriirtaan iimaylka QRIS@dcyf.wa.gov ka hor inta aysan summadda ka soo muuqanin websaaydka. Fadlan ciwaanka iimeylka ka dhig “Use of Early Achievers Logo” (Isticmaalka Summadda Early Achievers).

### Waraaqaha/Buug-yaraha Barnaamijka Waxbarashada Hore

Markaaad rabto in aad ku darto summada Early Achievers buug-yaraha ganacsigaaga iyo/ama warqadaha ganacsiga si aad u suuq geyso barnaamijka waxbarashada hore, fadlan raac tilmaamahan:

- Astaantu waa inaysan ku jirin bogga ciwaanka ee buug-yaraha xayaysiinta ee barnaamijka waxbarashada hore.
- Haddii aad isticmaasho summada Early Achievers, waa inaad sidoo kale ku dartaa mid ka mid ah weedhahan soo socda:
    - "Si sharaf leh uga qaybqaadanaya Early Achievers, Nidaamka Aqoonsiga iyo Horumarinta Tayada ee Washington" ama

- "Na weydiiso sida aan u muujineyno sida ay nooga go'an tahay waxbarashada hore ee tayada sare leh anagoo ka qayb qaadanayna Early Achievers, Nidaamka Aqoonsiga iyo Horumarinta Tayada ee Washington!"

Fadlan kala shaqee tababarahaaga ama hay'adda CCA ee WA ee deegaankaaga si aad u taageerto wacyigelinta qoyska iyo bulshada. Waxaa kale oo aad la wadaagi kartaa ka qaybqaadashadaada Early Achievers adiga oo gelaya agabka wacyigelinta ee qiimaha badan ee laga heli karo onlayn ahaan halkan https://childcareawarewa.org/providers/

## 9. Sharuudaha iyo Filashooyinka Ka qeybqaataha

Qaybta soo socota waxay faahfaahinaysaa mas'uuliyadda barnaamijkaaga waxbarashada hore iyo waxyaabaha laga filayo ka qaybgalaha Early Achievers. Fadlan sidoo kale tixraac Heshiiska Ka qaybgalka Early Achievers si aad u ogaato waxa laga filayo ka qaybgalka.

### U Qalmidda

Qaybtani waxa ay qeexaysaa shuruudaha u qalmitaanka ee diiwaangelinta iyo ka qaybgalka Early Achievers.

#### Nooca Barnaamijka Waxbarashada Xilliga Hore

*Adeeg bixiyayaasha Shatiga ama Shahaadada Haysta*

Xarumaha daryeelka caruurta oo shatiyaysan, shahaado haysta ama bixiyayaasha daryeelka caruurta ee guriga qoyska ee u adeega caruurta da'doodu u dhaxeyso dhalashada illaa 5 sano jir ayaa u qalma diiwangelinta Early Achievers (Ingiriis | Isbaanish | Soomaali).

- Barnaamijyada waxbarashada hore ee lacagta ka hela kaalmooyinka soo socda ayaa looga baahan yahay inay ka qayb qaataan Early Achievers:
  - WCCC
  - Daryeelka Carruurta Xilliyeed
- Barnaamijyada waxbarashada hore ee u adeega kaliya carruurta da'da dugsiga jira uma qalmaan inay ka qaybqaataan wakhtigan.

*Adeeg-bixigayaasha Loo Xaqiijiyay Lacag-bixinta Kaliya*

Dhamaan barnaamijyada waxbarashada hore ee qaata kaalmada daryeelka ilmaha ee gobolka waxaa laga rabaa inay ka qeybqaataan Early Achievers Xeerka Dib u Eegista Lagu Sameeyay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW 43.216.085). Tan waxaa ku jira barnaamijyada waxbarashada hore ee milatariga, kuwa dugsiga ku saleysan iyo qabaa'ilka kuwaasi oo ah kuwa Loo Xaqiijiay Lacag-bixinta Kaliya iyadoo lala kaashanayo DCYF. barnaamijyada waxbarashada hor ee milatariga, dugsiga ku saleysan, ama qabaa'ilka ee ka reebida shatiga waa in loo Xaqiijiyaa Lacag bixinta Kaliya si looga diiwaangeliya Early Achievers.

- Soo dagso foomka si aad u dalbato Shahaadada Lacag Bixinta Kaliya.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka Shahaado Siinta Qabiilka (Word).

*Goobaha Bixiya Adeegyada ECEAP/Early*

Dhamaan barnaamijyada waxbarashada hore ee bixiya adeegyada ECEAP/Early ECEAP waxaa laga rabaa inay ka qeybqaataan Early Achievers (RCW 43.216.515).

## Shuruudaha Diiwaangelinta Carruurta

DCYF way fahamtaa in diiwaangelinta ay isbedeli karto, gaar ahaan daryeelka carruurta qoyska guriga. Sidaa darteed, is diiwaangelinta hooseysa ma saameyn doonto u qalmitaanka barnaamijka waxbarashada hore si la iskaga diiwaan geliyo Early Achievers.

- Si aad uga qaybgasho Xogta Barnaamijka ee bilawga ah iyo soo gudbinta Muuqaalo Goos-goos ah, adeeg bixiyaha waa inuu haystaa ugu yaraan hal ilmo inta u dhaxaysa dhalashada illaa 5 jir.
- Xarumaha daryeelka carruurta ee hoos ugu dhacay diiwaan gelinta ugu yar ee saddex carruur ah iyo guryaha daryeelka carruurta qoyska ee ka hooseeya diiwaangelinta ugu yar ee hal cunug waa inay macallinkooda ku ogeysiiyaan toddoba maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood. Tababarayaashu waxay si toos ah ula shaqayn doonaan barnaamijyada waxbarashada hore si ay u horumariyaan qorshe lagu kordhinayo diiwaangelinta.

## Xaaladda Shati-siinta

Dhamaan barnaamijyada waxbarashada hore ee shatiaga ama shahaadada haysta waa in ay ku jiraan xaalad wanaagsan oo dhanka shati-siinta ah si markaas ay uga qeybqaataan Early Achievers. "Xaalad wanaagsan" waxaa loola jeedaa haysashada shati aan dhacayn oo aan la hakinin, lagala noqon, ama ku sugan xaalad tijaabo ah. Websaytka DCYF ayuu ku qoran yahay macluuumaad dheeraad ah oo ku saabsan shati-siinta iyo qeexitaanada ereyada. Shatiyada leh xiritaan ku meel gaar ah ayaa wali loo tixgalinayaa inay ku jiraan "meel wanaagsan."

### *Shatiga Koowaad*

Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu leeyahay shatiga bilowga ah, waxaad iska diiwaan gelin kartaa si aad uga qaybgasho Early Achievers oo waxaad buuxin kartaa Xogta Barnaamijka Bilowga ah. Si kastaba ha ahaatee, ma dhamaystiri kartid Heerka Tayada Early Achievers ilaa aad ka hesho shatiga aan dhacaynin.

### *Xaalada aan Gudbinta Laheyn*

- Haddii barnaamijkaaga hore ee waxbarashada uu ku jiro "xaalada aan gudbinta lahayn," waxaa laga yaabaa inaad weli iska diiwaan geliso si aad uga qayb qaadato Early Achievers haddii aad xaalad wanaagsan ku jirto.
- Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore lagu meeleeyo xaaladda "gudbin la'aanta" inta lagu jiro ka qaybqaadashada, waxaad sii wadi kartaa ka qayb qaadashada hawlaha Early Achievers.
- Haddii barnaamijkaaga hore ee waxbarashada uu ku jiro "xaalad gudbin la'aan ah," waxaa laga yaabaa inaadan dhamaystirin Heerka Tayada.
- Haddii shatiga barnaamijka waxbarashada hore lagala noqdo, markaas ma iska diiwaan gelin kartid si aad uga qaybgasho Early Achievers.
- Haddii DCYF ay kala noqoto shatiga barnaamijka waxbarashada hore marka aad ku jirto Early Achievers, markaas barnaamijkaagii hore ee waxbarashada waa laga noqon doonaa, iyadoon loo eegin Heerka Tayada. Dhammaan howlaha la xiriiro Early Achievers waa la joojinayaa.

### *Sookoobida Joojinta*

- Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu leeyahay shatiga ka joojinta kooban, markaa ma iska diiwaan gelin kartid si aad uga qaybgasho Early Achievers.
- Haddii shatiga barnaamijkaaga waxbarashada hore uu ku jiro ganaax kooban marka aad ka diiwaangashan tahay Early Achievers, dhammaan waxqabadyada iyo adeegyada la xiriira Early

Achievers way hakan doonaan ilaa natiijada baaritaanka. Intaa waxaa dheer, laga yaabaa inaadan codsan ama aadan ka qaybgelin wareegga aqoonsiga tayada inta lagu jiro hakinta kooban.

- Haddii hakinta kooban ay keento in si buuxda loo soo celiyo shatigaaga, markaas waxaad sii wadan kartaa ka qaybqaadashada Early Achievers.
- Haddii hakinta kooban ay keento kala noqoshada shatiga barnaamijka waxbarashada hore, DCYF waxay isla markaaba ka noqon doontaa barnaamijkaaga Early Achievers dhammaan hawlaha la xiriira Early Achievers iyagana way joogsan doonaan.
- Haddii hakinta koobani ay keento shati tijaabada, barnaamijkaaga waxbarashada hore waa inuu buuxiyaa shuruudaha u qalmitaanka ee lagu qeexay qaybta shatiga tijaabada ee hoose.

*Shatiga Tijaabada*

- Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu helo shatiga tijaabada marka aad ka diiwaangashan tahay Early Achievers, waxaad sii wadi kartaa ka qaybqaadashada Early Achievers inta lagu jiro xilliga tijaabada. Waa inaad si firfircoon ula shaqeysaa shati bixiyahaaga sidii dib loogu soo celin lahaa shatiga aan dhicin. Dhammaan tababarada waxay diiradda saari doonaan u hoggaansanaanta shatiga.

*Ka Qeybqaadashada Mustaqbalka*

Haddii ay dhacdo in DCYF ay kala noqoto barnaamijkaaga waxbarashada hore Early Achievers sababtuna tahay ku guuldaraysiga buuxinta shuruudaha shatiga ee sare, markaa waxaad dib u codsan kartaa ka qaybgalka. Si aad ugu qalanto inaad dib u codsato ka qaybgalka Early Achievers, barnaamijkaaga waxbarashada hore waa inuu ahaado mid shati u haysta xaalad wanaagsan oo raacaa nidaamka lagu qeexay Shuruudaha Ka qaybgalaha iyo Waxa laga filayo: Dib u Codsiga Early Achievers.

## Qeexitaanka Ka Qaybgal Firfircoon

Ka qaybqaadashada firfircoon macnaheedu waa in adiga iyo shaqaalahaaga barnaamijka waxbarashada hore aad muujinaysaan caddaynta inaad ka shaqaynayso Heer Tayo, adiga ama taageero laga helayo tababare. "Ka qaybqaataha firfircoon" waxa uu buuxiyaa waxyaabaha soo socda:

- Tus caddaynta waxqabadyada horumarinta tayada sida la shaqaynta tababarahaaga, abuurista QIP, dhamaystirka qaybaha Qaabdhismeedka Aqoonsiga Tayada, ka qaybgalka Bulshooyinka Dhaqanka, ama ka qayb qaadashada koorsooyinka Horumarinta Xirfadeed ee la xiriira ka qaybqaadashada Early Achievers.
- Ku hayso macluumaadka xiriirka ee la cusboonaysiiyay gudaha MERIT, oo ka jawaab wixii xiriir ah ee lagama maarmaanka ah ee ka yimaada DCYF ama CCA ee WA.
- Haddii aad aqbasho maalgelinta gobolka, waa inaad ilaalisaa wakhtiga Early Achievers ama la xiriir DCYF iyo/ama shaqaalaha gobolka CCA WA haddii aad halis ugu jirto inaad weydo guul muhiim ah.
- Ka qaybqaadashada firfircoon uma baahna inaad aqbasho adeegyada tababarka. Haddii aad doorato inaad ka baxdo tababarka, waxaad weli mas'uul ka tahay inaad ilaaliso waqtiyada iyo ka jawaabista xiriirada DCYF, CCA ee WA, ama Cultivate Learning.

## Diiwaan-haynta

Waa inaad ku xafidaa diiwaannada soo socda goobta barnaamijka waxbarashada hore:

- Dhammaan heshiisyada la saxiixay oo ay ku jiraan heshiiska adeegyada Early Achievers.
- Dhammaan rasiidhada, diiwaanada iyo dukumeentiyada sidaad u isticmaashay Abaalmarinta QI (waa inaad haysaa illaa toddobo sano).
- Nuqul ka mid ah qorshaha kharashka codsiga Deeqda Baahiyaha Ku salaysan iyo dhammaan rasiidhada, diiwaanada, iyo dukumeentiyada sida aad u isticmaashay maalgalinta Deeqda Baahida ku salaysan (waa inaad haysaa illaa todoba sano).
- Dhammaan waalidka/masuulka waxay u oggolaadeen in carruurta ay kaqeybqaataan qiimaynta.

DCYF iyo CCA ee WA waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan oo ay dib u eegaan diiwaanada la xiriira ka qaybgalka si loo xaqiijiyo diiwaangelinta, isticmaalka lacagaha, ama u hogaansanaanta Tilmaamaha Hawlgalka wakhti kasta.

## Sharuudaha Ogaysiinta

Waxaa lagaa rabaa inaad ku wargeliso sanduuqa QRIS iyo wakaalada hogaanka gobolka todoba maalmood oo maalmaha shaqada ah gudahood wixii isbedelo la taaban karo oo saameeya ka qaybgalka, oo ay ku jiraan:

- Isbedelka cinwaanka.
- Xiritaanka barnaamijka waxbarshada hore.
- Isbeddelka heerka shatiga: ka joojinta, tijaabinta, ama ka noqoshada.
- Diiwaangelinta hooseysa: wax ka yar saddex carruur oo diiwaangashan.
- Ka laabashada iqtiyaarka ee Early Achievers.
- Isbeddelka Lala Xidhiidhaha Early Achievers.
- Isbeddellada da'da loo adeego, hadday tahay awoodda shatiga ama doorbididda daryeel bixiyaha haddii barnaamijka waxbarashada hore uusan u adeegin carruurta dhalashada illaa da'da 5 jir.
- Isbeddelka ku meel gaadhka ah ee duruufaha barnaamijka waxbarashada hore,sida xidhitaanka ku meel gaadhka ah iyo maqnaanshaha la kordhiyay ee lala xidhiidhaha Early Achievers.

## Sida Cinwaanka iyo Lahaanshaha Isbeddelkoodu u Saameeyaan Kaqaybgalka Early Achievers

### Isbeddelka Lahaanshaha

Haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu beddelo lahaanshaha inta lagu jiro marxalad kasta oo ka qaybqaadashada Early Achievers, waa inaad la xiriirtaa QRIS@dcyf.wa.gov. Shaqaalaha DCYF ayaa kula shaqayn doona si ay u go'aamiyaan sida isbeddelka lahaanshaha u saameeya ka qaybgalka ama xaalada Heerka Tayada. Shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore iyo deegaanku waa qaybaha muhiimka ah ee Heerka Tayada Early Achievers, markaa goobaha waxaa laga yaabaa in looga baahdo inay dhamaystiraan Wareegga Aqoonsiga Tayada mar labaad haddii ay jiraan isbeddello la taaban karo. Marka DCYF ay ku wareejiso shatiga daryeelka ilmaha inta u dhaxaysa milkiilayaasha iyo lambarka Aqoonsiga Daryeel Bixiyaha ma isbeddelo, taariikhda ka qaybqaadashada Early Achievers iyo shuruudaha wakhtiga ayaa lagu wareejin doonaa shatiga.

### Badalka Cinwaanka

Haddii goobtaadu bixiso adeegyada ECEAP oo aad leedahay Heer Tayo hadda jira oo aad u guurto xarun cusub, waa inaad la xiriirtaa kooxda Early Achievers QRIS@dcyf.wa.gov lix bilood gudahood laga bilaabo guuritaanka.

Haddii aad tahay bixiyaha xanaanada carruurta guriga qoyska oo aad guurto, waa inaad ogeysiisaa shati bixiyahaaga, oo aad iimayl u soo dirtaa QRIS@dcyf.wa.gov 30 maalmood gudahooda laga bilaabo taariikhda ugu horreysa ee shatiga cinwaankaaga cusub. Haddii aad ku ogeysiiso DCYF wakhtigaas gudaheed, waxaad sii wadi doontaa taariikhdaada ka qaybqaadashada, oo ay ku jiraan Heerarka Tayada ee firfircoon, qiimayaasha magdhawga, iyo Abaalmarinta QI ee lagu dabaqay shatiga, ciwaanka cusub.

Haddii aadan bixin ogeysiis degdeg ah, waqtiyadaada Early Achievers ayaa dib u bilaabmaya DCYF waxay kuu tixgelin doontaa sida bixiye kaalmo oo cusub. Waxaad u baahan doontaa inaad dib isku diiwaan geliso Early Achievers si aad u hesho kaalmada iyo magdhawga heerarka leh oo waa inaad raacdaa wakhtiga laga filayo bixiyaha kaalmada ee cusub.

## Wadaagida Macluumaadka

DCYF waxay u hogaansamaysaa cutubka 42.56 RCW, Xeerka Diiwaanka Dadweynaha. Diiwaanada ka qaybqaatayaasha Early Achievers ee haysashada DCYF ama iskaashatooyinka bulshada ayaa sidoo kale laga yaabaa in lagu sii daayo sida hoos timaada cutubka 42.56 RCW.

## Isticmaalka/Ammaanka Intarnetka

Ka qaybgalayaasha Early Achievers waa inay isticmaalaan MERIT, WA Compass, CeCi, and WELS. Nidaamyadan xogta ayaa loo baahan yahay iyada oo qayb ka ah ka qaybqaadashada Early Achievers. Nidaamyadan xogta ku saleysan websaaydka ayaa ah kuwo sugan waxayna u baahan yihiin soo galitaanka isticmaalaha si uu u galo macluumaadka. DCYF, CCA of WA, and UW Cultivate Learning waxay heli karaan dhammaan xogta la geliyo nidaamyada xogta Early Achievers si ay u taageeraan shaqadaada horumarinta tayada iyo qiimeynta muddada fog ee barnaamijka Early Achievers. Si la iskugu xiro dadaallada loona yareeyo nuqul ka mid ah, tababarayaashu waxay eegi karaan faylasha tababarayaasha kale ee ka shaqeeya isla barnaamijka waxbarashada hore. Intaa waxaa dheer, dhammaan macluumaadka la geliyay nidaamyada xogta waa la codsan karaa shaacintooda sida kor lagu sheegay.

## Iska-horimaadka Danaha

Ka qaybgalayaasha Early Achievers waxaa laga yaabaa in aan loo shaqaaleysiin sidii tababarayaasha Early Achievers, isuduwayaasha gobolka, xubnaha shaqaalaha DCYF, ama xubin ka tirsan kooxda Aqoonsiga Tayada ee UW inta ay ka qayb qaadanayaan Early Achievers.

## Heshiiska Adeegyada Early Achievers

CCA ee WA waxay siisaa adeegyada tababarka ka qaybgalayaasha Early Achievers oo u adeegaya boosaska in ka yar 75% ee Head Start/ECEAP/Early ECEAP. Ujeeddada wakiil gobol kasta waa inuu ku caawiyo barnaamijkaaga waxbarashada hore inuu dhammaystiro qaybaha aqoonsiga tayada, u diyaargaroobo Codsiga Heerka Tayada, oo uu sii wado dadaalka horumarinta tayada ka dib markaad dhammaystirto Heerka Tayada. Heshiiska Adeegyada Early Achievers waxay sharaxaad siisaa warbixinta ku saabsan doorarka iyo masuuliyadaha labada dhinac. Adiga iyo shaqaalahaaga barnaamijka

waxbarashada hore waxaa la idinka rabaa inaad ka qaybqaadataan hawlaha Early Achievers sida lagu qeexay Tilmaamaha Hawlgelinta.

Haddii ay xaaladdu ka hor istaagto in barnaamijkaaga waxbarashada hore si buuxda loogu hawl galo, waxaad codsan kartaa inaad si ku meel gaar ah u joojiso adeegyada. Waxaa muhiim ah in la ogaado in kasta oo CCA ee WA laga yaabo inay joojiyaan adeegyadooda, wakhti kasta oo ay baahan tahay [RCW 43.216.085](https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=43.216.085) isma beddelayso.

Haddii adiga iyo shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore aydaan sii wadin ka qaybgalka firfircoon, shaqaalaha CCA ee WA waxaa laga yaabaa inay doortaan inay joojiyaan adeegyada. Haddii adiga ama shaqaalahaaga aad ka jawaabi waydaan, aad si joogta ah uga maqan tihiin tababarada iyo wakhtiyada kulanka la qorsheeyay, ama aadan samayn dadaal daacad ah si aad u dhawrtaan heshiiska adeegyada, CCA ee WA ayaa qoraal kugu ogaysiin doonta inay joojin karaan adeegyadooda si ku meel gaar ah illaa seddex bilood. Intaa waxaa dheer, DCYF waxay dooran kartaa inay joojiso adeegyada haddii adiga ama shaqaalahaagu aadan raacin Tilmaamaha Hawlgalka ama siyaasadda takoorka.

Joojinta adeegyada tababbarka ma beddeleyso heerka isdiiwaangelinta barnaamijkaaga waxbarashada hore ama u qalmitaanka lacagaha kale sida lacag-celinta heerarka leh. Barnaamijkaaga waxbarashada hore waxa uu heli doonaa fursad uu dib ugu bilaabo adeegyada CCA ee WA wakhtiyada loo cayimay saddexdii biloodba mar.

## Deeq Qaataha Head Start/Mas'uuliyadaha Qandaraaslaha /ECEAP/Early ECEAP

Waqtigaan, deeq qaataha/qandaraaslayaasha goobaha ee leh in ka badan boosaska 75% Head Start/ECEAP/Early ECEAP ayaa mas'uul ka ah:

- Samaynta qorshe Early Achievers loogu darayo hawlaha horumarinta tayada barnaamijkooda, oo ay ku jirto isticmaalka qalabka Early Achievers.
- Tababarista iyo hanuuninta shaqaalahooda Early Achievers.
- Caawinta shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore si ay diiwaannada xirfadeed ugu dhammaystiraan gudaha MERIT.
- Buuxinta codsiyada iyo maaraynta ka qaybqaadashada Early Achievers ee gudaha MERIT, CeCi, and WELS.
- Raadraacidda, kormeeridda iyo xiriirinta howlaha Early Achievers ee barnaamijka waxbarashada hore.
- Diyaarinta shaqaalaha barnaamijka waxbarashada hore si loo aqoonsado tayada.
- Deeq qaatayaasha/qandaraaslayaasha waxay kala xiriiri karaan DCYF wixii macluumaad ah ee ku saabsan tababarka Horumarinta Xirfadeed ee la heli karo.

## Shuruudaha Cayrinta

DCYF waxay xaq u leedahay inay bilawdo ka cayrinta barnaamijka waxbarashada hore ee Early Achievers xilli walba haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore ku guuldarreysato in ay buuxiso wax kamid ah filashooyinka lagu sheegay Heshiiska Ka qeybqaadashada Early Achievers ama Tilmaamaha Howlgalka Early Achievers.

Sharuuda ka saarida waxaa ku jira:

- Inaan lagu jirin xaalad wanaagsan oo shati leh: DCYF waxay ku qeexday *xaaladda wanaagsan* sida inaad haysato shati firfircoon oo aan la hakin, la burinin, ama aan tijaabo ku jirin.

- Isbeddellada da'da loo adeegay: barnaamijka waxbarashada hore uma sii adeego caruurta dhalashada ilaa da'da 5 jir sababtoo ah doorbididda daryeel bixiyaha ama tallaabada fulinta shatiga ee DCYF.
- Isbeddellada ku saabsan diiwaangelinta barnaamijka waxbarashada hore: ma jiro caruur da'doodu u dhaxayso dhallashada illaa 5 sano oo diiwaan gashan 60 maalmood oo isk xiga.
- Ku bixinta macluumaad been ah dalabka Early Achievers ama dokumentiyo kale oo kaqaybqaadasho.
- Aan la kulmin filashooyinka ka qaybqaadashada Early Achievers oo firifircoon sida lagu qeexay qaybta Ka qaybqaadashada Firfircoon ee Tilmaamaha Hawlgalka.
- Si Xun U Isticmaalka Deeqda Baahiyada Ku Saleysan Ama Lacagaha Abaalmarinta QI.
- Aan haysanin dhamaan diiwaanada, oo ay ku jiraan risiidhada iyo dokumentiyada isticmaalka Deeqaha Baahiyada Ku Saleysan ama lacagaha Abaalmarinta QI ee goobta shaqada muddo toddoba sannadood ah.
- Aan ka soo warbixinin isbeddelada hay'adda hoggaanka goboleed ee Early Achievers taasi oo ka dhigi karta barnaamijka waxbarashada hore inayna u qalmin ka qeybqaadashada Early Achievers.
- Habdhaqanka liita iyo habdhaqanka ku aaddan wakiilada Early Achievers ama shaqaalaha DCYF.
- Hadii la raaco waayo Tilmaamaha Howlgalka Early Achievers ama tilmaamaha kale ee maamul ama sharci ee ay samaysay hay'ad deegaan, gobol ama dawladda federaalka.

## Nidaamka Cayrinta

Haddii ay dhacdo in barnaamijkaaga waxbarashada hore uusan buuxin shuruudaha lagu qeexay Heshiiska Ka qeybqaadashada Early Achievers ama Tilmaamaha Hawlgelinta, ama haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu sameeyay falal kasta oo keeni kara joojinta ka-qaybgalka Early Achievers, wakaaladda hoggaanka gobolka waa in ay :

- Ku ogeysiisaa barnaamijkaaga waxbarashada hore, qoraal ahaan, baahida loo qabo in la qaado tallaabo sax ah.
- Siisaa barnaamijkaaga waxbarashada hore 30 maalmood si aad ugu hoggaansanto codsiga ficilka sixitaanka.
- Codsataa dukumeenti kasta oo lagu dabaqi karo barnaamijkaaga waxbarashada hore.
- Xaq u leedahay inay joojiso dhammaan ama qeyb howlaha Early Achievers inta lagu jiro hannaanka eegidda.
- Wargelisaa DCYF in barnaamijkaaga waxbarashada hore uu leeyahay ficilka saxda ah ee bilawga ah.
- Dib u eegtaa dhammaan macluumaadka uu bixiyay barnaamijkaaga waxbarashada hore, oo ay ku jiraan tillaabooyinka aad u qaadday xallinta arrinta, si loo go'aamiyo haddii ay jirto caddayn ku filan oo ah in barnaamijkaaga waxbarashada hore uu ku xad-gudbay dhinac kasta oo ka mid ah ka qaybgalka Early Achievers ama haddii kale uu u dhaqmay si anshax-darro ah.
- Ogeysiisaa DCYF talooyinka lagu joojinayo barnaamijkaaga waxbarashada hore. DCYF waxay gaartaa go'aanka kama dambaysta ah ee ku saabsan ka bixitaanka barnaamijka waxbarashada hore ee Early Achievers.
- Ku ogeysiisaa barnaamijkaaga waxbarashada hore go'aanka kama dambaysta ah, qoraal ahaan, 30 maalmood gudahooda markaad hesho dhammaan dukumeentiyada lagama maarmaanka ah si aad u gaarto go'aanka kama dambaysta ah.

Fadlan ogoow**:** Haddii ay dhacdo in ceyrinta Early Achievers ay keento heerka shati bixinta barnaamijkaaga waxbarashada hore, DCYF ayaa mas'uul ka ah ceyrinta sida lagu qeexay qaybta u qalmitaanka cutubkan.

## Ka laabashada Early Achievers

Haddii aad doorato inaad ka noqoto barnaamijkaaga waxbarashada hore ee Early Achievers, fadlan kala xiriir DCYF QRIS@dcyf.wa.gov si aad u codsato ka laabashada.

Haddii DCYF ay ka cayriso barnaamijkaaga waxbarashada hore ee Early Achievers ama aad si ikhtiyaari ah uga baxdo Early Achievers waa inaad:

- Siisaa hay'adda hogaanka gobolka Early Achievers dhammaan warbixinada aan la gudbin iyo macluumaadka ka qaybgalka.
- Ka saartaa dhammaan agabka suuqgeynta Early Achievers, oo ay ku jirto shahaadada Heerka Tayada ee barnaamijkaaga waxbarashada hore, dhanka xarumaha barnaamijka waxbarashada hore, websaaydka, iyo dhammaan agabka xayaysiinta.
- Dib u soo celisaa DCYF lacagaha Abaalmarinta QI ee aan la isticmaalin.
- Haddii aad doorato inaad ka noqoto barnaamijkaaga waxbarashada hore ee Early Achievers, waxaa kugu waajib ah inaad dhamaystirto ka noqoshadaada adigoo iimaylka usoo dirayo DCYF QRIS@dcyf.wa.gov.

Haddii ay dhacdo in DCYF ay joojiso barnaamijkaaga waxbarashada hore iyadoo ay ugu wacan tahay tuhunka isticmaalka lacagaha ee been abuurka ah ama ku guuldareysiga in la xafido diiwaanka isticmaalka lacagaha, barnaamijkaaga waxbarashada hore waxa laga yaabaa inuu mas'uul ka yahay waxyeelada sida uu sharcigu ogolyahay, oo ay ku jirto dib u bixinta lacagaha Horumarinta Tayada ee uu helay barnaamijkaaga waxbarashada hore.

## Dib u soo Codsashada Early Achievers

Haddii aad ka baxdo Early Achievers oo aad dib u codsato 12 bilood gudahooda laga bilaabo ka noqoshada, barnaamijkaaga waxbarashada hore waxa uu hayn doonaa dhammaan macluumaadka ka qaybgalka hadda jira, oo ay ku jiraan Heerka Tayada iyo shuruudaha wakhtiga. Haddii barnaamijkaagu uu dib u codsado 12 bilood gudahooda, dib uga ma bilaabi doontid wakhtigaaga halkii aad kaga tagtay wakhtiga ka bixitaanka. Tusaale ahaan, haddii barnaamijkaaga waxbarashada hore uu ka baxo lix bilood ka dib ka qaybqaadashada oo uu go'aansado inuu dib u galo Early Achievers saddex bilood ka dib, barnaamijku wuxuu ku jirayaa bishiisa sagaalaad laga bilaabo isdiiwaangelinta marka dib loo soo celiyo. Barnaamijkaagii waxbarashada hore ma lahan wax lacag celin ah oo heerar leh ama Abaalmarinta QI muddada laga baxay barnaamijkaagii waxbarashada hore.

DCYF waxay haysaa xaqa ay u diidayso dib u codsashada Early Achievers ka dib ka noqoshada ama ka saarida Early Achievers.

## Qaamuuska Erayada

| | |
|---|---|
| **Ka Qeybqaadashada Firfircoon** | Barnaamijka waxbarashada hore ee ka jawaabaya xiriirka, si buuxda uga qaybqaata, oo muujiya dadaalka loogu jiro Heer Tayo. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah: ka qayb qaadashada tababbarka, dhamaystirka qaybo ka mid ah Wareegga Aqoonsiga Tayada, dhamaystirka QIPs, diiwaan galinta dadaalada CeCi, ama ka qaybgalka tababarada horumarinta xirfadeed ee Early Achievers. |
| **Loo Xaqiijiyay Lacag-bixinta Kaliya** | Xannaanada carruurta iyo barnaamijyada waxbarashada hore ee si sharci ah looga dhaafay shatiyeynta (ciidanka, qabiilka, ama dugsiga) waxay codsan karaan shahaado si ay u helaan lacag-bixinnada kaalmada gobolka. Goobahan waa **Loo Xaqiijiyay Lacag-bixinta Kaliya.** |
| **Child Care Aware of Washington (CCA of WA)** | **CCA ee WA** waa hay'adda hogaanka u haysa isku dubaridka hawlaha horumarinta sida horumarinta xirfadeed ee ku salaysan xiriirka iyo tababarka goobaha leh boosaska wax ka yar 75% Head Start/ECEAP/Early ECEAP. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo www.childcareawarewa.org. |
| **Tababar/Tababarid** | **Tababarid** waa adeeg joogto ah oo muddo dheer ah oo lagu bixiyo Early Achievers si ay uga caawiso ka qaybgalayaasha inay fahmaan siyaasadaha Early Achievers oo ay si guul leh ugu fahmaan nidaamka. Tabobarka waxaa loogu talo galey in:<br>• Kor Loogu Qaado Horumarinta Xirfadeed ee Ku Salaysan Xiriirka.<br>• Lagu taageero bixiyayaasha si ay u fahmaan nidaamka aqoonsiga tayada.<br>• Ka qaybgalka wada sheekaysi kor u qaadaya sinnaanta oo si wanaagsan u beddela dhaqamada.<br>• Ka caawinta barnaamijka waxbarashada hore inay fahmaan Heerarka tayada Early Achievers.<br>• Bixinta macluumaad iyo ku talinta Horumarinta Xirfadeed.<br>• Ka caawinta arnaamijyada inay fahmaan oo isticmaalaan aqoonsiga tayada Early Achievers iyo xogta qiimaynta.<br>• Taageeridda hadafyada barnaamijka iyo abuurista QIPs. |
| **Coach Educator Collaborative Interface (CeCi, oo hore loogu yiqiin Coaching Companion)** | Aaladda Onlaaynka/Barnaamij (app) ee loo isticmaalo in lala xiriiro ka qaybgalayaasha oo loo fududeeyo horumarinta tayada ay hogaaminayaan Barnaamijyada Wxbarashada Hore, Macalimiinta, iyo Xiriirada Bulshada. |

| | |
|---|---|
| **Xiriirka Bulshada** | **Xiriirka Bulshada** waa xiriirka ugu horreeya ee ka qaybgalayaasha Early Achievers ay ka helaan Kooxda Aqoonsiga Tayada Waxbarashada Cultivate Learning. Xiriirka Bulshada waxay taageeraan oo hagaan ka qaybgalayaasha habka Aqoonsiga Tayada waxayna u adeegaan barta ay kala xiriiraan kooxda Aqoonsiga Tayada. Xiriirka Bulshadu waxa uu gaari doonaa ka qaybgalayaasha loo ogolaaday qayb kasta oo ka mid ah habka Aqoonsiga Tayada waxana uu:<br>• Sharaxayaa habka Aqoonsiga Tayada iyo waxa dhici doona inta lagu jiro qayb kasta.<br>• Bixinayaa taageero gaar ah inta lagu jiro qayb kasta oo ka mid ah aqoonsiga tayada.<br>• Bixinayaa taageero farsamo oo dhanka CeCi.<br>• Bixinayaa Xiriir u dhexeeya barnaamijka iyo kooxda Aqoonsiga Tayada. |
| **Qandaraasle** | **Qandaraasle** macnaheedu waa hay'adda bixisa adeegyada ECEAP ee hoos timaada qandaraaska DCYF. Doorkan waxaa badanaa lagu kooxeeyaa hogaaminta barnaamijka Head Start waxaana lagu magacaabaa "deeq qaate/qandaraasle." |
| **Early Achievers** | **Early Achievers** waa nidaamka tayada, aqoonsiga, iyo hagaajinta Washington (Quality, Recognition, and Improvement System, QRIS) waxaana loogu talagalay inuu:<br>• Taageero daryeel bixiyeyaasha caruurta si ay u bixiyaan daryeel tayo sare leh iyadoo la siinayo agab ay ku jiraan tababaro, la talin, iyo abaalmarin.<br>• Ka caawiyo waaladiinta iyo daryeel bixiyayaasha in ay helaan daryeelka carruurta oo tayo sarreeyo iyo barnaamijyada barashada hore oo ku habboon baahiyahooda.<br>• Hubiyaan in carruurtu helaan waayo-aragnimo waxbarashada hore oo tayo sare leh ee ku caawisa inay kobciyaan xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan dugsiga iyo nolosha. |
| **Lala Xidhiidhada Early Achievers** | Lala xidhiidhaha barnaamijka waxbarashada hore ee koowaad ee ka masuulka ah kormeerka iyo dhammaystirka dhammaan hawlaha Early Achievers. Barnaamijyada waxbarashada hore waxa laga yaabaa inay magacaabaan xiriir labaad oo Early Achievers ah si ay u caawiyaan xiriirka aasaasiga ah ee hawlaha ka qaybgalka. |
| **Tilmaamaha Horumarinta Waxbarshada Hore** | **Tilmaamaha Horumarinta Waxbarashada Hore** waa macluumaad gobolka oo dhan ah oo loogu talagalay bixiyeyaasha daryeel caruurta iyo qoysaska. Tilmaamaha waxay bixiyaan macluumaadka lagama maarmaanka ah si ay u taageeraan oo kor loogu qaado horumarka iyo waxbarashada carruurta, oo ay ku jiraan macluumaadka heerarka korriinka iyo xeeladaha lagu taageerayo heerarka kala duwan ee koritaanka. Tilmaamaha waxaa ka mid ah lix qaybood oo horumarineed:<br>• Ku saabsan aniga iyo qoyskayga iyo dhaqankayga.<br>• Dhisidda xiriiro.<br>• Taabasho, aragti, maqal, iyo socod.<br>• Caafimaad ku korida.<br>• Wada Xiriirka. |

| | |
|---|---|
| | • Barashada aduunkayga. |
| **Barnaamijka Waxbarashada hore iyo Da'da Dugsiga** | Waxaa loola jeedaa dhammaan barnaamijyada ama goobaha xannaaneeya caruurta dhalashada illaa 12 sano jir. Noocyada daryeel bixiyeyaasha daryeelka caruurta ee gudaha Early Achievers:<br>• Xarunta Daryeelka Carruurta<br>• Bixiyaha Daryeelka Ilmaha ee Guriga Qoyska ama Bixiyaha Waxbarashada Hore ee Guriga Qoyska<br>• Barnaamijka Da'da Dugsiga<br>• Barnaamijka Head Start (HS)<br>• Barnaamijka ECEAP/Early ECEAP<br><br>Dukumeentigan barnaamijka waxbarashada **hore waxa loola** jeedaa xarunta waxbarashada hore ee ka qaybqaadanaya. |
| **Xeerka Early Start** | **Xeerka Early Start (ESA)** ayaa la ansixiyay Luulyo 6, 2015, waxaana loogu talagalay in lagu caawiyo dhammaan carruurta inay imaadaan dugsiga iyagoo diyaar u ah inay wax bartaan. Marka loo eego ESA, laga bilaabo Agoosto 1, 2016, daryeelka ilmaha shatiga haysta iyo bixiyayaasha waxbarashada hore ee bixiya adeegyada carruurta iyo qoysaska ee u qalma kaalmada WCCC waa in lagu diwaangeliyaa Early Achievers si loo ilaaliyo oggolaanshaha kaalmada. ESA waxay kaloo sharraxaysaa shuruudaha iyo ka qaybgalka Heerka Tayada ee goobaha bixiya adeegyada ECEAP/Early ECEAP. |
| **Dhameey Heerkayga Tayada** | Marka ka qaybqaataha uu kasbado tiro dhibco ah oo lagu doonayo gudaha muddada wareega aqoonsiga, waxaa laga yaabaa inay codsadaan inay dhamaystiraan oo ay daabacaan Heerkooda Tayada. |
| **Dhameey Heerkayga Tayada oo La Cusboonaysiiyey** | Marka ka qaybqaataha uu dib u soo gudbiyo qaybta aqoonsiga ee loo baahan yahay, waxay codsan karaan inay cusboonaysiiyaan Heerkooda Tayada ee la daabacay. |
| **Deeq Qaataha** | **Deeq Qaataha** ayaa mas'uul ka ah kormeerka barnaamijyada Head Start/Early Head Start. Doorkan waxaa badanaa lagu kooxeeyaa hogaaminta barnaamijka ECEAP waxaana lagu magacaabaa "deeq qaate/qandaraasle." |
| **Bey'adda/Kulanka Waxbarashada** | Meel carruurta sida caadiga ah loo daryeelo, oo ay ku jirto, laakiin aan ku xaddidnayn, fasal, meel bannaan oo waxbarasho, meel bannaan oo shati u leh daryeelka carruurta guriga qoyska, iwm. Loo isticmaalo beddelka "Fasalka"<br>*Tusaale hal kulan oo hal (1) deegaan waxbarasho ah.*<br>• Hal qol oo leh koox isku mid ah oo caruur ah waa Kulan.<br>*Tusaale laba (2) fadhi oo hal (1) deegaan waxbarasho ah.*<br>• Hal qol oo leh laba (2) kooxo macalin/carruur oo kala duwan oo lagu aqoonsado qol qaybiye.<br>• Hal qol oo ay ku jiraan laba (2) macalin oo kala duwan ay ku leeyihiin kooxo kala duwan oo caruur ah AM iyo koox kale oo caruur ah PM. |

| | |
|---|---|
| **MERIT** | **Qalabka Macluumaadka ee Waxbarashada iyo Diiwaanka la Maareeyay ee Washington (Washington's Managed Education and Registry Information Tool,** MERIT) waxa loo isticmaalaa in lagu diiwaangeliyo oo lagu aqoonsado guulaha xirfadeed ee daryeelka hore iyo waxbarashada iyo xirfadlayaasha da'da dugsiga. MERIT waa isha caddeynta mudada qiimaynta shahaadooyinka waxbarasho ee shaqaalaha ee Koboca & Tababarka xirfadle ee barnaamijka waxbarashada hore. Isticmaalidda MERIT waxay u sharuud u tahay Ka Qeybqaadashada Early Achievers. |
| **Carruurta Aan Gaarin Da'da Dugsiga** | **Da'da aan dugsiga gaarin** waxaa lagu qeexaa inay yihiin carruurta da'doodu tahay 6 iyo kuwa ka hooseeya ee aan ku jirin dugsiga barbaarinta ama fasal. |
| **Xogta Barnaamijka** | **Xogta Barnaamijka** waa fursad bixiyayaasha iyo qoysaska ay ku bixiyaan xogta barnaamijkooda.<br>• Agaasimayaasha, macalimiinta, iyo qoysasku waxay aqoonsadaan meelaha ay ku xoogan yihiin iyo meelaha ay ka koraan barnaamijka waxbarashada hore iyaga oo dhamaystiraya waraysiga.<br>• Xogta Barnaamijku waa fursad uu barnaamijku ugu dabaal-degayo waxa ay ku faanaan iyo waxa ka dhigaya kuwo gaar ah.<br>• Habka Xogta Barnaamijku waxa uu ku salaysan yahay cilmi-baaris, waxa uu bixiyaa jawaab celin iyo xog qiimo leh, waxa uu kor u qaadaa ka qaybgalka qoyska, waxana uu taageeraa wareegga tababarka CQI. |
| **Qorshaha Hagaajinta Tayada (QIP)** | Dhammaan barnaamijyada waxbarashada hore ee heerka 3-5 waxay abuuri doonaan**QIP** iyagoo kaashanaya macalimiintooda oo ku salaysan natiijooyinka qiimaynta barnaamijka waxbarashada hore, qaybaha Heerarka Tayada, iyo guud ahaan barnaamijka waxbarashada hore ee Heerka Tayada. **QIP** waa qorshe ay ku jiraan yoolal, tillaabo waxqabad si loo gaaro yoolalka, waqtiyada, iyo agabka loo baahan yahay. |
| **Heerka Tayada** | Heer la daabacay oo uu gaaray Barnaamijka Barashada Hore kaas oo lagu soo bandhigay websaaydka Hubinta Daryeelka Caruurta ee DCYFs. |
| **Khabiirka Aqoonsiga Tayada** | **Khabiirka Aqoonsiga Tayada** waa xubin ka tirsan kooxda Aqoonsiga Tayada UW ee masuulka ka ah aqoonsiga tayada. **Khubarada Aqoonsiga Tayada** waxay la shaqeeyaan barnaamijyada waxbarashada hore si ay:<br>• U bixiyaan jawaab celin iyo qiimeyn ku saabsan Xogta Barnaamijka iyo Muuqaalka Goos-gooska ah.<br>• Dib ugu eegaan diiwaanada iyo dukumintiyada. |
| **Heerarka Tayada** | Heerarka Nidaamka Early Achievers ee Aqoonsiga iyo Horumarinta Tayada (**Heerarka Tayada**) waa qaab-dhismeed dhamaystiran, oo cilmi-baaris ku salaysan si loo taageero natiijooyinka wanaagsan ee goobaha waxbarashada hore. Waxaa jiro lix goobood ee **Heer Tayo** ah: Natiijooyinka Ilmaha; Manhajka iyo Taageerada Shaqaalaha; Bay'ada Waxbarashada iyo Is-dhexgalka; Horumarinta Xirfadda iyo Tababarka; iyo Ka-qaybgalka Qoyska iyo Iskaashiga. |
| **Codso Aqoonsiga Tayada** | Marka ka qaybqaataha uu diyaar u yahay inuu soo gudbiyo qayb si dib u eegis loogu sameey (tusaale, Xogta Barnaamijka, Muuqaal Goos-goos ah, |

<table>
<tr><td></td><td>iwm.), waxay DCYF u gudbin doonaan codsi aqoonsi kuwaasoo markaas wargelinaya Cultivate Learning.</td></tr>
<tr><td>Dib U Soo Gudbinta Si Loo Aqoonsado Tayada</td><td>Barnaamijku waxaa laga yaabaa inay dib u soo gudbiyaan qayb aqoonsi haddii ay u baahan yihiin ama ay doortaan inay helaan dhibco sare.</td></tr>
<tr><td>Dib U Eegidda Diiwaanada iyo Qalabka Dib U Eegidda Diiwaanada</td><td>Dib U Eegidda Diiwaanada waxay u ogolaataa daryeel bixiyeyaasha inay soo gudbiyaan caddaynta Heerarka Tayada.<ul><li>Daryeel bixiyeyaasha waxay soo gudbin karaan caddaynta meelaha Heerka Tayada ee Natiijooyinka Ilmaha, Isdhexgalka iyo Manhajka, iyo Ka qaybgalka Qoyska iyo Iskaashiga iyagoo soo galinaya feelal.</li><li>Dukumeentiyada taageeraya waa inay ku jiraan caddayn qoran oo ah siyaasadaha iyo dhaqamada, sida siyaasadaha ku jira buug-gacmeedka shaqaalaha.</li><li>Daryeel bixiyeyaasha ayaa dooran kara Heerarka Tayada ee ay rabaan inay u soo gudbiyaan caddaynta; waxay dooran karaan qaar ama dhammaan.</li><li>Daryeel bixiyayaasha waxay doortaan Qalabka Dib U Eegidda Diiwaanada (Records Review Tool, RRT) si ay u tixraacaan oo u soo gudbiyaan caddaynta.</li></ul></td></tr>
<tr><td>Jaamacadda Washington (University of Washington, UW)</td><td>Jaamacadda Washington (UW) waa hay'adda hoggaanka qiimaynta, u kuur-galka, iyo shaqada Heerka Tayada. Khabiirada Aqoonsiga Tayada ee UW waxay qabtaan barnaamijka waxbarashada hore ee booqashooyinka qiimaynta ee goobta. UW ayaa sidoo kale masuul ka ah hormarinta Qaabdhismeedka Tababaraha Early Achievers.</td></tr>
<tr><td>Muuqaalada Goos-gooska ah</td><td>Muuqaalada Goos-gooska ah waa muuqaalo 10-15 daqiiqo ah oo muuqjinaya isdhexgalka macalinka iyo ilmaha ee fasal kasta ama jawi waxbarasho kasta.<ul><li>Macallimiintu waxay aqoonsadaan Tilmaamaha Waxbarashada Hore ama Kartida Muhiimka ah si ay ugu muujiyaan muuqaalkooda oo ay u qoraan milicsi gaaban.</li><li>Khubarada Aqoonsiga Tayada waxay dib u eegaan fiidiyowyada iyagoo isticmaalaya qoraal ku salaysan cilmi-baaris waxayna bixiyaan jawaab celin ku saabsan dhanka awoodaha iyo fursadaha koritaanka.</li><li>Iyadoo loo marayo tababar ku salaysan dhaqangelin iyo hababka xaqiijinta dhaqameed tababarayaasha iyo daryeel bixiyayaasha ayaa si wadajir ah dib ugu eega ra'yi celinta si ay ugu dabaaldegaan guulaha una abuuraan yoolalka horumarinta tayada.</li><li>Laba muuqaal oo goos-goos ah ayaa looga baahan yahay fasal ama kulan kasta oo waxbarashada hore ah (da'da 0-5).</li></ul></td></tr>
<tr><td>Working Connections Child Care (WCCC)</td><td>WCCC waa barnaamij kaalmada daryeelka caruurta ee gobolka kaas oo ka caawiya qoysaska dakhligoodu yar yahay inay bixiyaan kharashka daryeelka ilmaha inta ay shaqaynayaan. Dhammaan daryeel bixiyayaasha shatiga ama shahaadada haysta ee helaya lacagaha WCCC ee carruurta da'da dugsiga aan gaarin waa in ay kaqeybqaataan Early Achievers.</td></tr>
</table>